# GOLAHA WAKIILADU:

**Markuu arkay:** Qodobada 21aad, 26aad, 38aad, 39aad, 77aad ee Dastuurka Jamhuuriyada SomaliLand.

**Markuu arkay:** In Baahiloo qabo in uu jiro Xeer lagu maamulo waddo marista Gaadiidka, Dadka iyo Xoolaha.

**Markuu Ogaaday:** Shilalka isdaba jooga ah ee maalin-kasta ka dhaca wadooyinka kala duwan ee dalka, kuwaas oo sababa dhimasho iyo dhaawac.

**Markuu ku qancay:** Warbixinaha ay soo saaraan sanad-kasta hay'adaha u xilsaaran Nabadgelyada Wadooyinka

# WUXUU
# <u>SOO-SAARAY XEERKAN</u>

# QAYTA 1AAD

# QODOBADA GUUD

## Qodobka 1aad

## Ereybixin

**Degsiimada Magaalada (township area):** Waxa loola jeedaa dhismayaal urursan, waddooyin iyo meelaha banaan ee lagu muujiyay magac qaab calaamad ahaana iyada oo ujeedadu tahay in lagu dhaqmo marka lagu soo dhawaado ama la gaadho xadkaasi
**Waddo:** Waxa loola jeedaa jid kasta oo dadweyne oo daamur leh una furan dad weynaha, xoolaha iyo isu socodka gaadiidka
**Waddada iyo Hareeraheeda:** Waxa loola jeedaa waddada laamiga ah, waddada lugta, iyo wadiiqooyinka, IWM.
**Dhabo:** Waxa loola jeedaa jid dabiici ah oo dhulka ka mid ah caadi ahaan una furan dadweynaha, xoolaha iyo isu socodka gaadiidka;
**Surin:** Waxa loola jeedaa jid dabiici ah oo caadi ahaan loogu talo galay in ay adeegsadaan xoolaha iyo kuwa wadaa
**Laami:** Waxa loola jeedaa qaybta ka mid ka ah waddo kasta ee caadi ahaan loogu talo galay isu socodka gaadiidka
**Haad:** Waxa uu macnheedu yahay qayb ka mid ah laamiga oo leh balac ku filan si ay u maraan layn baabuur ahi
**Haadka dadweynaha:** Waxa loola jeedaa qaybta ka midka ah waddada, ee ka saraysa oogada waddada, ama si kalaba uga yar, ee ay isticmaalaan dadka lugeynayaa
**Waddo lugeed:** Waxa loola jeedaa qaybta ka midka ah waddada ama laamiga ee ay caadi ahaan adeegsadaan dadka lugaynayaa ama xoolahoodu
**Qaybta Dhexe:** Waxa loolajeedaa qayta ka midka ah haadka taas oo isu socodka gawaadhidu mamnuuc ka tahay, taas oo kala qaybisa qaybta loogu talo galay isu socodka gawaadhida u socota jiho gaara ama haad
**Goolad** Waxa loola jeedaa goob wareegsan oo lagu ranjiyeeyay ranji cadaan ah ama oogo dabiici ah oo la dhigay waddada si loo muujiyo badhtamaha isgoyska waddada
**Meesha ay ka gudbaan dadweynuhu:** Waxa loola jeedaa qaybta ka mid ka ah waddada ee lagu muujiyay calaamadaha ugu haboon, oo loogu talagalay in ay adeegsadaan marka ay ka gudbayaan waddooyinka
**Qalooc:** Waxa loola jeedaa waddo dheer ama laami, taas oo ahayn toos oo aragtidu ay soo koobmayso.
**Laf ama buur:** Waxa loola jeedaa waddo dheer taas oo aragtidu ay soo koobmaso iyada oo ay is badalayaan heerka tiiradu.
**Gaadiid:** Waxa loola jeedaa mishiin uu qof waddo oo wareegaya waddooyinka, oo ayna ku jirin mishiinada aan mishiin ahaan is wadin ee loogu talo galay in ay adeegsadaan caruurta iyo dadka curyaamiinta ah.

## Qodobka 2aad
## Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa dhammaan xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland

## Qodobka 3aad
## Ujeedada Xeerka

Xeerkan waxa lagu maamuli doonaa wada marista gaadiidka, dadka jidka socda iyo xoolaha. iyadoo lagu fulinayo wareegtooyinka Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland isaga oo soojeedinayo Wasiirka Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guryayntu

,

## Qodobka 4aad
## Shuruudaha Mabnuucida Iyo Xadidaada La Xidhiidha Isu Socodka Waddooyinka Qaranka

1. Gudoomiyaha Gobolku, isaga oo soo saaraya amar sababaysan, isaga oo eegaya sababo xaga amaanka ah, caafimaadka bulshada ah ama arimo dhinaca tasiilaadka milatariga ah, ama isaga oo tixgalinaya xaalado gaara oo waddo kasta oo dawladeed, dhabo roob awgeed ama sabab kaleba darteeed, isaga oo eegaya sabab kasta oo kale oo la xidhiidha danta guud, waxa uu:

    a. ku meel gaadh ahaan hakin karaa isticmaalka waddooyinka dawlada ama dhabooyinka dhamaan kuwa adeegsada ama qayb ka mid ah kuwaasi, waxa uu ku soo rogayaa fasax gaar ahaaneed adeegsiga gaadiid gaara;

    b. Waxa uu soo saari karaa shuruudo, mamnuucitaano ama xanibaado, ku meel gaadha ama rasmi ah, oo uu ku sameeyo waddo dawladeed, dhabo ama qaybo ka mid ah, qayb gaara oo ka mid ah dadka waddada isticmaala, marka uu u arko lagama maarmaan sababo aad u muhiima oo isu socodka ah awgood ama sabab ah qaab dhismeed gaara oo waddadu ama dhabadu leedahay.

2. Awaamiirtaasi lagu xusay farqada hore waxa lagu ogaysiin doonaa dadweynaha qaab calaamad waddo mariseed ah, haddii ay ku haboonaatana qaabkii kale oo lagu muujin karo.

3. Qof kasta oo ka soo horjeesta shuruudahaasi, mamnuucyadaasi ama xanibaadahaasi lagu sheegay ee Qodobkan, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 10,000 ilaa 50,000 Sl.Shls/=

.

## Qodobka 5aad
## Shuruudaha la Xidhiidha Mamnuucyada Isu-Socodka Waddooyinka Dawladaha Hoose

1. Duqa Caasimadu, isaga oo soo saaraya amar sababaysan, waxa uu sababo la xidhiidha amaanka bulshada, caafimaadka bulshada, baahiyo lagama maarmaan ah oo dhinaca milatariga ah, ama isaga oo tixgalinaya xaalado gaar ah oo ku saabsan waddo dawlad hoose leedahay ama dhabo uu roob ku da'ay, ama sabab kale oo dan guudi ku jirto:

   a. Waxa uu ku meel gaadh ahaan uga hakin karaa isticmaalka waddooyinka dawladaha hoose ama dhabooyinka dhamaan dadka isticmaalaya waddooyinka ama qayb ka mid ah gaadiidka isaga oo u shardinaya fasax gaar ahaaneed in ay helaan;

   b. Waxa uu samayn karaa shuruudo, mamnuucitaano, ama xanibaado, ku meel gaadha amaba rasmi ah, isaga oo ku sameynaya waddo, dhabo kasta oo dawlad hoose ama qayb ka mid ah, ama qayb gaar ah oo ka mid ah dadka waddooyinka isticmaala, haddii uu u arko lagama maarmaan baahiyaad xaga isu socodka ah, sabab qaab dhismeeed waddo amase dhabo gaar ah.

2. Maamulada Dawladaha Hoose waxa Kale oo ay**:**

   a. Ku go'aansan karaan amar uu duqa caasimadu soo saaray, meelaha dhigashada baabuurta loo ogolyahay (parking);
   b. Qaraar uu soo saaray Golaha Deegaanku, waxa uu la wareegi doonaa maamulka tooska ah ee meelaha dhigashada iyo ilaalinta baabuurta meelaha loogu talo galay dhigashada iyo ilaalinta baabuurta, isaga oo go'aansanaya shuruudaha manfacaasi. Goobaha loogu talo galayo dhigashada baabuurta waxa loo qaabayn doonaa si aan loo xanibin isu socodka baabuurta.
   c. Awaamiirta lagu xusay farqadan waxa lagu ogaysiin doonaa dadweynaha qaab ah calaamad waddo mariseed iyo meelaha ku haboon qaabkii kale ee lagu muujin karo.
   d. Qof kasta oo ku xadgubda shuruudahani, mamnuucitaanadan ama xanibaadaha la inagu siiyay Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 10,000 ilaa 50,000 SL. Shls/=.

## Qodobka 6aad
## Xidhida Waddooyinka

1. Xidhida waddooyinka haddii ay tahay ku meel gaadh ahaan ee lagu xidho waddada ama qayb ka mid ah waddada iyadoo lagu taagayo dhismayaal ama waxyaabo kale oo xidhaya lama ogolaan doono marka ay xidhayso isu socodka caadiga ah ee waddooyinka amase ay yaraynaso aragtida, haddii ayna dhismayaashaasi lagama maarmaan u ahayn xaaladaha degdega ah.

2. Xidhida waddooyinka lagu xidho gawaadhi, cariishyo, buulal ama boodhadhka ganacsi ama ciyaaraha ama diinta ama munaasibadaha dhaqanka, waxa loo ogolaan karaa si caadi ah meelaha isu socodka baabuurtu aanu aad u fara badnayn, iyada oo ay shardi tahay in in dhismayaashaasi aysan carqaladayn isu socodka isla markaana uu masaafo ku filan siiyay dadka soconaya.

3. Haadka dadweynaha iyo waddada cagta waxa la xidhi karaa oo keli ah xad ah ilaa saddex meelood laba meelood oo ka mid ah balacooda iyada oo shardi tahay in bedka soo hadhay ay ku filantahay dadka lugeynaya.

**Qodobka 7aad**
**Shaqada iyo Waxyaabaha La Dhigo Waddada**

1. Qof kasta oo waddada shaqo ka wada ama dhiga walax waddo waxa uu:

   a) Marka uu hawl ka waddo ama uu walax dhigayo, waxa uu qaadi doonaa talaabooyinka lagama maarmaanka u ah si uu u hubiyo isu socodka gaadiidka iyo badbaadada isu gudubka;

   b) Waxa uu ku waageeri doonaa godadka uu qodo ama hawsha kale ee u socota calaamado si fiican loo arki karo (Calaamadaha Waddada Lagu Xidho);

   c) Haddii uu xidhayo ama uu leexinayo, isu socodka qayb ahaan, ama gabi ahaanba, waxa uu dhigi doonaa tiro ku filan oo isugu jira walxo cadaan iyo casaana si gudub ah la isugu raaciyay waddada **(Calaamadaha Waddada Lagu Xidho ee Aragtida Celiya)**;

   d) Waxa uu ku xidhi doonaa laydh casaana waddada oo si joogto ah u baxaya (shidmaya) waqtiyada habeenkii si shaqo kasta, god kasta, ama alaabo la dhigayba, ama calaamadaha waddada lagu xidhay, iyo waxyaabaha waageeray oo si uun u xanibaya sida ay doontaba ha ahaatee qayb ka mid ah waddada taas oo laga arkayo masaafo muuqata;

   e) Waxa uu dhigi doonaa calaamad muujinasa **(Hawl baa ka socota)** labada dhinacba meel u dhaw halka shaqadu ka socoto ama uu wax dhigey.

   f) Shaqada waxa uu waddi doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee ugu suurto gashan maalmaha shaqada iyo saacada caadiga ee joogtada ah, haddii aysan sidaasi ka hor imaanin sabab la xidhidha awood ka baxsani.

g) Wuxuu dhulka ku soo celin doonaa xaaladiisii hore waxanu meesha ka saari doonaa dhismayaasha iyo waxyaabaha kale ee uu ka dul dhisay maadaama baahidii loo qabay aysan jirin.

2. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya Qodobkan waxa lagu ganaaxi doonaa xadhig gaadhaya shan iyo afartan maalmood ama ganaax ka bilaabma 50,000 ilaa 200,000 Sl.Shls/=.

## Qodobka 8aad
## Ku Tartanka Waddooyinka

1. Tartanka la tartansiiyo xoolaha, ama gaadiidka ay xooluhu jiidaan ama gawaadhida, mootooyinka waxa ay ka dhici karaan waddooyinka dadweynaha ama meelaha dadweynaha iyada oo looga qaadanayo fasax uu bixiyo Gudoomiyaha Degmada tartanka lagu qabanayo haddii dhulka la dhex marayaa uu yahay in ka badan hal dagmo oo isu gobola, fasaxaaasi waxa bixin doona Gudoomiyaha Gobolka ama Wasiirka Arimaha Gudaha, kolba xaaladu sida ay tahay.

2. Tartanka baaskilladuhu uma baahna wax fasaxa, laakiin dadka qabanqaabinayaa waxa ay ogaysiin doonaan madaxda faqrada 1aad ku xusan ugu yaraan saddex maalmood ka hor maalinta tartankaasi uu dhacayo madaxdaasina waxa ay wax ka badeli karaan waddada kolba sida ay ula haboonaato iyaga oo eegaya sababo xaga amaanka bulshada ah.

3. Xaalad kasta, madaxda awooda u lihi waxa ay ogaysiin hore siin doonaan maamulada dawladaha hoose ee ay ku yaalaan waddooyinka tartankaasi ka dhacayo.

4. Qaban qaabiye kasta oo ku dhaqmi waaya Qodobkan waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 10,000 ilaa 50,000 Sl.Shls/=. Haddii uu yahay tartan dhexmaray xoolo, ama gaadiid ay xoolo jiidaan ama baaskiilado; haddii uu yahay tartan dhexmaray gawaadhi waxa lagu ganaaxi doonaa xadhig gaadhaya shan iyo affartan maalmood ama ganaax ka bilaabma 10,000/= ilaa 200,000 Sl.Shls/=.

## Qodobka 9aad
## Xamuulka aan Caadiga ahayn iyo Gawaadhida Noocyada Gaarka ah

1. Rarida xamuulka aan qayb samayn ee culayskoodu ka yaryahay xadkii loogu talo galay ee leh jiritaan gaar ah oo dul maraya waddooyinka ama gaadhiga, waxa fasax siin kara Gudoomiyaha Degmada, ama haddii rarkaasi ay dhex marayaan in ka badan hal degmo waxa bixin doona Gudoomiyaha Gobolka, fasaxa caynkaas ah waxa loo shardiyi doonaa Guddi farsamo oo shaqadoodu tahay dayac tirka waddada waana ay bixin karaan iyada oo ay shardi tahay ilaalinta iyo dhawrida oogada waddada iyo xasilaada rarku.

2. Fasaxaas faqradaha hore lagu xusay waxa kale oo uu ina tusi doonaa xadaynta ugu haboon iyo shuruudaha la ilaalinayo si loo hubiyo bad-baaddada socdaalka waxana ay habayn doonaan wixii magdhaw ah oo laga bixin doono wixii dhib aan caadi ahayn oo ku dhacay waddada ama haadka.

3. Qof kasta oo waddo mariya rar aan caadi ahayn ama isticmaal gaadhiyeed oo nooc gaar ah isaga oo haysan fasaxa looga baahanyahay, ama aan ku dhaqmin xadidaada iyo shuruudaha lagu bixiyay fasaxaasi, waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 40,000 ilaa 100,000 Sl.Shls/= Waxana uu bixin doonaa magdhawga lagu hagaajin doono waddada iyada oo loo eegayo labada farqadood ee hore.

4. Qof kasta oo gaadhi kaxeeya isaga oon haysan fasaxa loo jideeyay waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 50,000 Sl.Shls/=.

## **Qodobka 10aad**
## **Xayaysiisyada, Boodhadhka iyo Qaababka kale ee Xayaysiinta Walxaha Ifahaya**

1. Adeegsiga isticmaalka boodhadhka, ama qaababka kale ee xayaysiis, iyo walxaha ifa ee ka dhex muuqda baabuurta maraysa waddooyinka, ama haddii meesha ay ku yaalaan, noocooda, qaabkooda, midabkooda, ama meesha ay ku yaalaanba ula ekoonaadaan Wasiirka Hawlaha Guud iyo Guryaynta iyo Gaadiidka, ama la noqoto Duqa Caasimada marka ay waddada iska leeyihiin maamul dawlad hoose, lagu khaldayo calaamadaha waddooyinka, ama sababababaya calaamadaha waddooyinka, laydhka in la isku khaldo, waala mamnuuci doonaa.

2. Laydhka widh-widhaya sidoo kale waa la mamnuuci doonaa, Gaadhina laguma dhajin karo xayaysiis ifaya oo ka kooban laydh widh-widhaya ama muuq soo celiye kaas oo lagu khaldayo laydhka calaamada u ah waddo marista.

3. Oogada boodhku iyo siyaabaha kale ee la ogolyahay xayaysiintu kama badan karaan lix mitir oo affar jibaaran. Meelaha ka baxsan goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka), boodhadhka noocaas ahi ama nidaamyada kale xayaysiintu waxa lagu taagi doonaa in u jirta masaafo aan ka yarayn 200 mitir calaamad kasta oo waddo mariseed amase in aan ka yarayn saddex mitir cidhifka laamida.

4. Boodhahdka iyo noocyada kale ee xayaysiis een waafaqsanayn shuruudaha Qodobkan waxa fujin doona qofkii fasaxa u haystay isaga oo isticmaalaya kharashkiisa, waxanu ku fujin doonaa waqtiga ay siiyeen Hay'ada Waddooyinku waqtigaasi sinaba ugama badan karo shan iyo toban maalmood.

5. Haddii ka dib, dhicida waqtigii la soo siiyay, boodhadhka noocaasi ah ama nidaamyada kale ee xayaysiisyada aan la fujin, waxa fujin doona Hay'ada Waddooyinka iyaga oo isticmaalaya kharashka qofka fasaxa u hastay.

6. Qof kasta oo waddo dhiga boodh, nooc kale oo xayaysiis isaga oon fasax haysan, ama ku guul daraysta in uu buuxiyo farqadaha kale ee Qodobkani, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 60,000 Sl.Shls/=.

## QAYBTA 2AAD
## CALAAMADAHA WADA-MARISTA

### Qodobka 11aad
### Calaamadaha Wada-Marista

1. Calaamadaha waddooyinka ayaa lagu taagi doonaa waddada ama meelaha u dhaw si ay u bixiyaan digniino, mamnuucitaano ama xog.

2. Qaranka iyo dawladaha hoose waxa ay dhigi doonaan calaamadaha waddooyinka ee wada digniinaha ama mamnucyada iyo haddii ay u arkaan lagama maarmaan, si ay u gudbiyaan warbixin, si loogu dhigo waddooyinka ay maamul ahaan hoos yimaadaan.

3. Waa masuuliyada maamulka Dawlada hoose in ay dhigaan goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka) calaamadaha wada marista astaan muujinasa magaca goobta.

4. Calaamadaha waddo marista waxa lagu ilaalin doonaa xaalada ugu wanaagsan, haddii ay haboonaatana, aaladaha muuqa soo celiya ayaa lagu xidhayaa.

### Qodobka 12aad
### Calaamadaha Laamiga

1. Dawlada dhexe iyo dawladaha hoose waxa ay ku calaamadin doonaan waddada xariijimo dherer iyo gudub ah iyo calaamado kale. iyaga oo adeegsanaya kharashkooda

2. Haadadka waddo-marista waxa lagu qaybin doonaa laguna samayn doonaa layman sagbad ah oo dhereran kuwaas oo aan is jiidhayn. Uma bannaana gawaadhidu in ay laymankaasi ka gudbaan, Laamiga waxa lagu calaamadin doonaa layman dherer ah kuwaas oo fidsan ilaa iyo cidhifka laamiga.

3. Laymankaasi dherersani ee ku yaala badhtamaha waddo lugeedu waxa ay xadidi doonaan laymanka sagbada ah ee waddo cageedu u qaybsantahay. meelaha ay laymankaasi ay sagbad yihiin, baabuurta isdhaafkoodu waa la mamnuuci doonaa, haddii ay go'anyihiina isdhaafka waa la ogolyahay.

4. Laymanka gudubka ah waxa ay noqon karaan qaar sagbada ama go'an.

5. Baabuurta socotaa kama gudbi karaan laymanka gudubka ah ee shagbada ah iyada oo ay shardi tahay in ay yeeshaan calaamada seynyaalaha ee joogsiga.

6. Meelaha dadku ka gudbaan waxa lagu muujin doonaa calaamado gudub ah oo kala go'go'an oo u eg daliinbta dameer farawga ah (zebra crossings).

7. Laymanka muujinaya meelaha dadweynahu ka gudbaan waxa ay noqon karaan qaar sagbad ah haddii mid ka mid ah laymankaasi uu sidoo kale muujinayo goobta wadayaashu ay joogsan doonaan ee senyaalaha joogsigu ku yaalo.

8. Laynka tilmaamaha ahi ama walxaha kale, ha noqdaan qaar dherar ah ama is gudub ah, waxa loo tixgalin doonaa layn adke ah.

9. Calaamadaha kale ayaa loo adeegsan doonaa ujeedada ah in la inagu tuso jihada socodka, meelaha waddo marista laga mamnuucay, meelaha loo diidanyahay baabuurta, goobaha basasku ku hakadaan, meelaha dhigashada baabuurta (parking), ogaysiisyada, ama wixii kale ee leh ujeedo la mid ah. Waxyaabaha muuqa soo celiya ayaa lagu rakibi doonaa calaamadaha haadka baabuurta.

10. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya sida ay muujinayaan calaamadaha waddo maristu waxa lagu ganaaxi doonaa, haddii ficilkaasi uusan kaynsanayn denbi ka culus, ganaax dhan 5000 to 25,000 SL.Shls/=.

## Qodobka 13aad
## Waddo Marista waxa Habayn Doona Saraakiisha Booliska

1. Calaamadaha saraakiisha booliiska ee habaynaya waddo maristu waxa ay noqon doonaan sidan soo socota:

   **a.** labada gacmood oo si quman oo dherar ah loo kala bixiyo, oo la siman jihada wada marista, si loo joojiyo socodka baabuurta;

b. labada gacmood oo si siman loo kala bixiyo jihada socodka baabuurta, si loo ogolaado isu socodka baabuurta;
c. Hal gacan oo la kala bixiyo si siman iyada oo gacanta hore la ruxayo, si loo muujiyo wada marista taxadarku ku jiro iyo xawaare dhimis in looga baahanyahay haadka, la siman gacanta la kala bixiyay.

2. Saraakiisha booliisku, si ay u fududeeyaan isu socodka baabuurta, waxa ay amri karaan in baabuurta lagu kaxeeyo xawaare sareeya meelaha ay gawaadhidaasi ay istaagi karaan ama ay leexin karaaan baabuurta jiho cayiman ka imasa.

3. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya seenyaalaha saraakiisha booliiska ee xukuma isu socodka baabuurta, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5000 ila 25,000 SL.Shls/=.

4. Haddii wadaha baabuur aanu istaagin, isaga oon ixtiraamin seenyaalaha sidaasi muujinaya ee uu sameeyay sargaalka bilayska ka midka ahi, ganaaxaasi waxa uu noqon doonaa mid ka bilaabma 5000 ilaa 30,000 SL.Shls/=.

### Qodobka 14aad
### Mamnuucida Adeegsiga Calaamada Ka Duwan Kuwa Uu Sharci Jideeeyay

Adeegsiga calaamada, ka duwan kuwa uu sharciga waddo maristu jideeyay ama si xun u adeegsiga calaamadahaasi waa mamnuuc.

## QAYBTA 3AAD
## GAADIIDKA

### Qodobka 15aad
### Kala Saarida Gaadiidka.

Gaadiidka waxaa ka mid ah:

a. gaadiidka gacanta lagu kaxeeyo;
b. gaadiidka xoolaha lagu jiido;
c. baaskiilada saddex shaaglayda ah;
d. Baaskiiladaha iyo mootooyinka saddexda shaag leh;
e. Mootooyinka;
f. Baabuurta;

g. Tareenlayaasha;
h. Baabuurta beeraha.

**Qodobka 16aad**
**Gaadiidka Gacanta Lagu Kaxeeyo Iyo Kuwa Xoolaha Lagu Jiido**

Gaadiidka gacanta lagu kaxeeyo ama xoolaha lagu jiido waxa ku jiri doona:

- **a.** gaadiidka loo sameeyay asal ahaan in lagu guro rakaabka;
- **b.** gaadiidka asal ahaan loo sameeyay in lagu guro badeecadaha;
- **c.** gaadhi dameerka asal ahaan loogu talo galay in loo adeegsado beeraha;

**Qodobka 17aad**
**Baaskiilka Saddexda Shaag leh**

Baaskiilka Saddexda Shaag lehi waa gaadiid leh laba ama saddex shaag oo uu waddo qof isaga oo adeegsanaya beydal ama wax la mid ah.

**Qodobka 18aad**
**Mootada iyo Saddex Shaaglayda**

Mootadu waa gaadiid si farsamo ahaana u socda oo leh labo ama saddex shaag iyo:

a. Mug dhululubo injiin oon ka badnayn 50 centimitir oo affar jibaaran;
b. Awood minqiyaas ahaan injiin (horse-power) oon ka badnayn 1.50 HP;
c. Culays ingiin oon ka badanayn 16kgs;
d. Xawaare waddada siman oon ka badnayn 50kms saacadiiba;

Haddii gaadiidkaasi ay ka Bataan xadka loo jideeyay iyaga oo leh astaamaha farsamo ee aynu kor ku soo xusay, waxa loo tixgalin doonaa mooto.

**Qodobka 19aad**
**Mootooyinka**

Mootooyinku waa gadiid farsamo ahaan is wada oo leh saddex ama laba shaag, iyo ingiin mugiisu dhan yahay 50 cm oo afar jibaaran. Waxana ka mid noqon doona:

a. mootooyinka iyo mootooyinka yar yar leh saddex ama laba shaag, ee loogu talo galay in lagu qaado rakaabka;

b. mootada saddex shaaglayda ah ee loogu talo galay in lagu guro alaabta;
c. Mootooyinka yar yar nooceeda lagu guro rakaabka iyo alaabtaba.

**Qodobka 20aad**
**Gawaadhida**

Gawaadhidu waa gaadiid injiin waddo oo ugu yaraan leh affar taayir waxana ku jiri doona:

a. *Gawaadhida yar yar*: gaadiidka loo sameeyay in lagu qaado rakaabka oo Leh qaad kuraaseed oon ka badnayn sagaal qof marka laga reebo wadaha.
b. *Basaska*: waa gaadiidka loo sameeyay in lagu qaado rakaab oo leh culays Qaad oo ka badan sagaal rakaaba oo aanu ku jirin waduhu.
c. *Gawaadhida waawayn*: baabuurta gaar ahaan loo sameeyay in lagu qaado Alaabta iyo kuwa loogu talo galay in lagu qaado badeecad gaar ah.
d. Baabuurta gaarka ah waa kuwa loogu talo galay ujeedada gaarka ah, laguna xidhay qalab gaar ah qolofkiisa ah (wiishashka wareega, kuwa dabka, iwm), gawaadhida lagu qaado xamuul gaar ah Waa kuwa loo sameeyay in lagu qaado rakaabka marka ay jiraan duruufo gaar ahi ama badeecado gaar ah, laguna rakibay qalabkii ku haboonaa ujeedadaasi (kuwa gargaarka degdega ah iyo kuwa talaagadaha leh, iwm.).
e. *Baabuurta*: gawaadhida loogu talo galay rakaabka iyo badeecadaha;
f. Baabuurta qalabka gaar ka ahi ku rakibanyahay iyo gawaadhida ka kooban buudhi iyo jiide

**Qodobka 21aad**
**Tareenlayaasha**

1. Tareenluhu waa gaadhi aan mishiin wadin oo uu jiido gaadhi. Tareenlayaasha waxaa ku jira:
   **a.** Tareenlayaasha lagu guro rakaabka;
   **b.** Tareenlayaasha lagu guro badeecada;
   **c.** Tareenlayaasha lagu guro labadaba (rakaabka iyo badeecada).

2. Buudhiga aan ka badnayn labada shaag ee lagu qaado shandadaha, qalabka iyo alaabaha la mid ka ah, waxa loo qaadan doonaa qayb muhim ah oo ka mid ka ah gaadhiga la jiidayo.

**Qodobka 22aad**
**Gawaadhida Beeraha**

Gawaadhida beeraha waxa ka mid ah:
**a.** Cagafyada beeraha;
**b.** Mishiinada la qaadan karo ee loo adeegsado ujeedada beeraha;
**c.** Gawaadhida beeraha.

**Qodobka 23aad**
**Gawaadhida Loogu Talo Galay Dhismayaasha Waddooyinka**

Gawaadhida loo isticmaalo dhismayaasha waddooyinka waxa ku jiri doona: tareenlayaasha iyo kuwa ku shaqeeya uumiga ee loo adeegsado ujeedooyinka ah dhismaha, dayactirka iyo kabkabka waddooyinka, ama shaqo kale.

## QAYBTA 4AAD
## HABKA ADEEGSIGA DHAMAAN NOOCYADA GAADIIDKA

**Qodobka 24aad**
**Xadidaada Baaxada**

1. Balaca guud ee gaadhiga iyo xamuulka uu qaadayaaba kama badan karaan 2.50 Mitir. dherarka guud ee gaadhigu iyo culayska uu sidaana kama badan karaan 4 mitir.

2. Balaca guud, ee ay ku jiraan qacaayaduhu kama badan karaan lix mitir marka laga hadlayo gawaadhida leh affarta taayir, ama 11 mitir marka laga hadlayo lix taayirlaha. balac guud oo dhan 11 mitir ayaa loo ogolaan doonaa basaska affarta shaag leh balaca guud ee tareelayaasha kama badan karaan 6 mitir marka laga hadlayo kuwa labada taayir leh, 7.50 mitir ayaa loo ogolyahay tareenlayaasha affarta taayir leh, 8 mitir oo loo ogolyahay tareenlayaasha leh lix ama in ka badan oo taayiro ah.

3. Dherarka guud ee gaadhiga is jiidka ah (buudhiga iyo ka jiidaya) sinaba ugama badan karo 18 mitir. Buudhiyo dheeraada iyo waxyaabaha kale ee ku xidhan laguma rakibi karo dhinacyada baabuurka.

4. Farqadaha Qodobkani hore laguma adeegsan karo gawaadhida loo adeegsado dhismayaasha waddooyinka, iyo baabuurta ay xooluhu jiidaan ee ayna ku xidhnayn caleemaha dhoobada ka reebaa.

5. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax ka bilaabmaya 30,000 ilaa 200,000 SL. Shls/=.

**Qodobka 25aad**
**Xadidaada Xamuulka**

1. Buudhiga la jiidayo ee gaadhigu, oo ku jiro culaska gaadhigu marka uu socdo iyo xamuulkiisuba, kama badan karaan culayska guud ee lagu xusay buuga Diwaangelinta ee gaadhigaasi loo soo saaray.

2. Marka laga tago siyaabaha kale ee sharci jideeyo, qof kasta gaadhi saara culays ka badan xadkii loo ogolaa ee Qodobkani, waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax ka bilaabma 50,000 ilaa 200,000/=.

**Qodobka 26aad**
**Taarikada Gaarka ah ee Gawaadhida iyo Basaska**

1. Mulkiilayaasha gawaadhida ama basaska waxa ay ku dhejin doonaan meel muuqata oo dhinaca bidixda ah ee gaadhiga taariko ina tusaysa faahfaahintan soo socota: magaca mulkiilaha, lambarka taarikada iyo baaxada gaadhiga.

2. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5,000 ilaa 30,000 SL. Shls/=.

**Qodobka 27aad**
**Gawaadhida La Jiido**

1. Gaadhina ma jiidi karo wax ka badan hal gaadhi isla waqti kaliya.

2. Gaaadhigu waxa uu jiidi karaa gaadhi kale oo ka duwan tareenlaha kaliya marka gaadhigaasi la jiidayaa aanu socon taas oo ay keentay cilad ama iyada oo ay ka maqanyihiin qaybo muhim ahi.

3. Kaawaha isu xidha tareenlaha iyo gaadhiga la jiidayaa iyo gaadhiga wax jiidayaa, iyo sidoo kale qodobada la ilaalinayo iyo taxadarka la qaadanayo haddii khatari timaado waxa ay noqon doonaan qaar aan khatar galinayn badbaada isu socodka.

4. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 30,000 ilaa 100,000 SL. Shls/=.

# QAYBTA 5AAD
# GAADIIDKA AY XOOLUHU JIIDAAN IYO BAASKIILADAHA SADDEXDA SHAAGLEYDA

## Qodobka 28aad
## Biriiga Gaadiidka Ay Xooluhu Jiidaan

1. Gaadiidka ay xooluhu jiidaan waxa lagu qalabayn doonaa biriig ku haboon oo shaqaynaya si dhibyar oo dhakhso ahna loo adeegsan doonno duruuf kasta oo jirta.

2. Biriiga aan ku shaqaynayn oogada waddada waa mamnuuc

3. Qof kasta oo xadgudba farqadaha Qodobkani waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax gaadhaya 5000 ilaa 25,000 SL. Shls/=.

## Qodobka 29aad
## Laydhka Gaadiidka ay Xooluhu Jiidaan:

1. Gaadiidka ay xooluhu jiidaan waxa lagu xidhi doonaa laba laydh oo hore oo cadaana iyo laba danbe oo casaan ah, waxa kale oo ay lahaan doonaan mid ama laba muuqaal soo celiye oo xaga danbe ku yaala.

2. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi ay xoolo jiidaan oon lahayn laydhka loogu talo galay iyo muuq soo celiye waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5000 ilaa 25,000 SL. Shls/=.

## Qodobka 30aad
## Taarikada Gaadiidka ay Xooluhu Jiidaan

1. Gaadiid kasta oo ay xoolo jiidaan waxa uu lahaan doonaa taariko leh lambar taxane ah iyo magaca dawlada hoose ama degmada, laga diwaangeliyey gaadiidkaasi.

2. Taarikadaasi waxa la siin doonaa laguna rakibi doonaa gaadhiga waxana ku xidhi doona dawlada hoose, haddii gaadiidkaasi dhex socdo hal maamul in ka badan gudoomiyaha degmada.

3. Qof kasta oo kaxeeya gaadiid ay xoolo jiidaan oon lahayn taarikada looga baahanyahay waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 60,000 SL. Shls/=.

4. Qof kasta oo sifo sharciga garab marsan ku soo saara ama iibiya Taarikada lambarka gaadiidka ay xooluhu jiidaan, ama adeegsada taariko sifo sharci daro ah lagu sameeyay waxa uu, haddii sharcigu uusan u aqoonsanayn gaf ka wayn, lagu ciqaabi doonaa xadhig dhan ilaa hal bil iyo ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 100,000 SL. Shls/=.

**Qodobka 31aad**
**Saddex Shaaglayda: Biriiga, Hoonka iyo Laydhka**

1. Saddex shaaglayda waxa lagu qalabayn doonaa taayiro iyo:
   a) Laba biriig oo kala duwan oo midi ku shaqo leeyahay taarida hore iyo mid ku shaqo leh taayirada danbe;
   b) Hoon bixiya digniin maqala marka lagu soo dhawaado.
   c) Laydh cadaana ama huruuda oo xaga hore ku xidhan iyo mid casaana oo ku xidhan xaga danbe ama muuq soo celiye xaga danbe eegaya.

2. Xubnaha farqada 1aad xarfaha (b iyo c) looma adeegsan doono saddex shaaglayda tartanka ku jirta.

3. Qof kasta oo kaxeeya saddex shaaglay bilaa taayiro ah ama aan lahayn biriig, hoon ama laydh kuwaas oon waafaqsanayn farqadaha Qodobkani, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan 5000 ilaa 25,000 SL. SHls/=.

## QAYBTA 6AAD
## QALABKA GAWAADHIDA, TAREENLAYAASHA IYO MOOTOOYINKA

**Qodobka 32aad**
**Gawaadhida: Biriigooda.**

1. Gaadhi kasta waxa lagu qalabayn doonaa:
   **a.** Biriig shaqaynaya kaas oo ka hawlgalaya taayirada gaadhiga dhamaantood, taas oo loo sameeyay in marka la adeegsado xawaaruhu is dhimo isla markaana baabuurka ku joojiyaan masaafo macquula, iyada oon loo eegayn xaaladaha iyo culayska saaran ama tiirada waddada;
   **b.** Biriiga joojinta kaas oo loo farsameeyay in ay ka hortagaan in taayiradu ay wareegaan marka gaadhiga laga tago iyada oon cidi dhex joogin, xataa waddada daadaga ah.

2. Marka laga hadlayo gawaadhida jiidaya tareenlaha ee loo sameeyay in lagu qaado rakaabka, ama haddii culayka buudhigu ee tareenluhu ka bato 35 sql, biriiga ka shaqaynayaa waxa uu noqon doonaa mid joogto ah oo is wada.

3. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi bilaa biriiga ama xaalada biriigiisu aysan waafaqsanayn farqadaha Qodobkan, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan 40,000 ilaa 100,000 SL. Shls/=.

## Qodobka 33aad
## Tareenlayaasha: Biriigooda

1. Dhamaan tareenlayaasha culayska buudhigoodu ka bato 750 kgs culays ahaan, waxa lagu xidhi doonaa biriig shaqaynaya kaas oo ka shaqaynaya dhamaan taayirada gaadhiga.

2. Tareenle kasta oo uu gaadhi jiidayo kaas oo loo sameeyay in lagu guro dad iyo badeecad waxa lagu xidhi doonaa biriig shaqaynaya oo loo sameeyay in ay ka hor tagaan in taayiradu in ay wareegaan marka gaadhiga aan la wadin ama isaga oo bilaa cida laga dego xataa haddii uu yaalo waddo daadaga.

3. Tareenle kasta oo loo sameeyay in lagu qaado rakaab waxa lagu xidhi doonaa biriig si joogto ah oo xidhiidha u shaqaynaya, oo joojin kara tereenlaha haddii ay dhacdaba in go'o xadhig kaawaha xidhiidhinaya buudhiga iyo tareenluhu.

4. Tareenle kasta waxa lagu xidhi doonaa xadhig kaawe waxana lagu xidhi doonaa gaadhiga wax jiidaya kaas oo silsilada isu xidha u noqon doona mid badbaado oo leh xoog iyo dhumuc taas oo lagu hubinayo in ay si fiican u shaqaynaso silsilada lafteedu.

5. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi jiidaya buudhi oon lahayn biriiga looga baahanyahay ama biriigiisu aanu la jaanqaadi karin farqadaha Qodobkan, waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 60,000 SL. Shls/=.

## Qodobka 34aad
## Mootooyinka iyo Saddex Shaaglayda Biriigooda

1. Mooto kasta ama mooto laba shaagleyda ahi waxa ay yeelan doontaa laba biriig oo kala duwan, mid qabanaya xaga hore iyo mid qabanaya kuwa danbe.

2. Haddii ay wax jiidaso, biriigyadaasi looga baahanyahay waa inuu sidoo kale qaban karaa waxa ay jiidaso.

3. Dhamaan mootooyinka saddexda shaagleyda ah waxa lagu xidhi doonaa laba biriig oo kala gaar ah, kuwaas oo qaban kara dhamaan taayirada gaadhiga.

4. Biriigyadaasi waxa loo qaabayn doonaa in isticmaalkoodu uu keeno in uu gaadhigu ku istaago masaafo macquula.

5. Baabuurta lagu xusay farqan saddexaad ee Qodobkan waxa lagu qalabayn doonaa biriiga xareynta (joogsiga) kuwaas oo loo qaabeeyay in ay ka hortagi karaan taayiradu in ay wareegaan marka gaadhiga laga tago iyada oo aysan cidi la joogin xataa waddada daadaga ah.

6. Qof kasta oo kaxeeya mooto ama saddex shaaglay taas oon lahayn biriigyada loogu talo galay ama biriigyo aan la jaanqaadi karin farqadaha Qodobkani, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabmaya 20,000 ilaa 60,000 SL. SHls/=.

## Qodobka 35aad
## Laydhka

1. Gaadhi kasta, saddex shaaglay kasta ama mooto kasta waxa ay lahaan doonaan laydh huruuda ama cadaana oo xaga hore ah, iyo laydh cas oo xaga danbe kaga yaala. Tareenle kastaa waxa uu lahaan doonaa muuq celiye cadaana oo xaga hore kaga yaala iyo mid casaana oo xaga danbe ah.

2. Gaadhi kasta oo noocan ahi waxa kale oo uu yeelan doonaa muuq celiye casaana oo xaga danbe kaga yaala.

3. Gaadhi kastaa ama mooto kastaa waxa ay lahaan doonaan laydh wayn kaas oo sii daynaya falaadho cadaana ama huruuda oo leh mug balaadhan oo muuq baahiye, kaas oo xaga hore ifinaya lana naaquso marka ay baabuurtu ka hor timaado.

4. Baabuutani waxa kale oo ay lahaan doonaan laydh cadaan xiga kaas oo muujinaya in gaadhigu dib u baxayo.

5. Mootooyinku waxa ay lahaan doonaan laydh diciifa oo xaga hore ku yaala.

6. Gaadhi kasta, mooto kasta ama tareenle kastaa waxa uu lahaan doonaa laydh casaana oo joojinaya oo xaga danbe eegaya oo shidma marka waduhu biriiga qabto.

7. Baabuurta uu balacoodu ka duwanyahay waxa ay lahaan doonaan ifiye xaga hore kaga yaala tareeenlayaasha balacoodu goonida yahayna waxa ay lahaan doonaan laydh xaga danbe ku yaala oo casaana oo ifahaya.

**8.** Tareenlayaashu waxa kale oo ay lahaan doonaan muuq soo celiye hurdi ah.
**9.** Taarikada lambarka xaga danbe waxa lagu ifin doonaa laydh cadaana.

**10.** Gaadhi kasta oo jiidaya gaadhi waxa uu lahaan doonaa seenyaale casaana oo ka kooban walax laba-jibaarane ah oo cabirkeedu yahay 20 centimitir dhinac walba ama laba jibaarane cabirkiisu yahay 20 cm oo affar jibaaran, oo xaga hore oo kali ah ifinaya, oo ay oogadiisuna wax laga dhex arki karo, iyo saddex geesle hurdi ah oo ku yaala oogo buluug madaw xiga ah, saddex geeskahaasi oo cabirkiisu yahay 16 cm dhinac walba.

**11.** Calaamadaasi waxa lagu xidhi doonaa si barbar ah dhexda baabuurka la jiidayo, umana jiri karo in ka badan 25 centimitir dherarka cabirka guud ee gaadhiga.

**12.** Qof kasta oo kaxeeya gaadhi aan lahayn qalabkaasi la waajibiyay oo seenyaalahiisa iyo laydhkiisaba la arkayo, ama seenyaale iyo laydh aan waafaqsanayn farqadaha Qodobkani, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5000 ilaa 30,000 SL. Shls.

## Qodobka 36aad
## Hoonka

1. Gaadhi kasta, mooto kasta ama baaskiilad kasta waxa lagu xidhi doonaa qalab awood u leh in uu bixiyo digniino marka loo soo dhawaado.

2. Digniin dheeraad ah waxa adeegsan doona baabuurta dab-damiska, ambalaasyada ujeedooyin dhinaca booliiska ah awgeed.

3. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi kaas oo aysan ku xidhnayn qalabkaa digniinta ee aynu soo sheegnay, ama ay ku xidhantahay qalab digniineed oon waafaqsanayn farqadaha Qodobkani, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5000 ilaa 25,000 SL. Shls/=.

## Qodobka 37aad
## Soo Saarida Qiiqa iyo Qaaca

3. Gaadhi kasta waxa lagu xidhi doonaa qalab ku haboon si ay u xakameeyaan mishiinku gubida uu ku samaynayo shidaalka iyo saliidaha iyo xaydhaha, iyada oo ujeedadu tahay in laga hortago soo saarida qaaca dheeraadka ah ama qiiqa ama qaac muuqda oo ka yimaada burmada.

4. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan 50,000 ilaa 100,000/ SL.Shls/=.

**Qodobka 38aad**
**Cod Naaqusayaasha- Qalabka Dib u Bixida iyo kan Joogsiga**

1. Gaadhi kasta, mooto kasta ama baaskiilad kasta waxa lagu xidhi doonaa qalab awood u leh kuna filan in ay dhimaan guuxa uu mishiinku sameeyo.

2. Gaadhi kasta, kaas oo ka bata 350 kgs. Culays ahaan marka uuna xamuul sidin waxa lagu xidhi doonaa geerasha dib u bixitaanka.

3. Gaadhi kasta ama tareenle kasta kaas oo kabata 35 sqls. Culays ahaan waxa lagu xoogin doonaa xamuul culus waxa lagu qalabayn doonaa hingisyo (wedges) oo loo adeegsan doono ujeedada ah in ay ka ilaaliyaan wareega taayirada haddiiba uu biriigu shaqayn waayo.

4. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi aan ku qalabaysnayn cod naaquse ama cod naaqusihiisu uusan la socon karin farqadaha Qodobkani, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5000 ilaa 25,000 SL. SHls/=.

5. Qof kasta oo kaxeeya mid ka mid ah gawaadhida lagu xusay farqadaha labaad ama sadexaad ee Qodobkani, oon gaadhigaasina lagu xidhin hingisyo (wedges), waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5000 ilaa 25,000 SL. SHls/=..

**Qodobka 39aad**
**Aragtida**

1. Gaadhi kasta, ama mooto yar oo kasta waxa loo qaabayn doonaa loona samayn doonaa in waduhu uu mar kastaba yeesho aragti guuud oo waddada ah iyo waxa ka horeeya gaadhiga. Gaadhi kasta oo noocaasi ah waxa kale oo lagu qalabayn doonaa muraayad haad danbe si waduhu uu u arki karo waddada iyo isu socodka ka danbeeya iyo kan ka horeeyaba.

2. Muraayada ku jirta gawaadhida ama mooto yar yar waxa ay noqon doontaa muraayad badbaado, oo si quman wax looga arki karo, taas oon qaloocinayn qaabka walxaha laga dhex arkayo loona qaabeeyay ama loo dhisay haddii ay dilaacdo in aysan u firdhin qurubyo kuwaas oo sababi kara dhaawacyo.

3. Muraayada hore waxa kale oo loo dhisi ama loo samayn doonaa haddii ay jabto in aysan xanibin aragtida.

4. Gaadhi kasta ama mooto yar oo kasta waxa lagu rakibi doonaa muraayad masaxe hore kaas oo awood u leh in uu shaqeeyo waxna laga arko muraayada xiliyada roobka.

5. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkan waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 50,000 SL. SHls/=.

### Qodobka 40aad
### Calaamadaha Aqoonsiga

1. Sancada iyo nooca gawaadhida, lambarka qacaayada iyo haddii uu yahay gaadhi ama mooto, lambarka mishiinka waxaa laga calaamadin doonaa qayb la arki karo oo ka mid ah gaadhi kasta, mooto kasta ama tareenle.

2. Haddii qacaayada gaadhiga ee mishiinku aysan calaamadsanayn ama ay tahay mid been abuura ah ama wax laga badbadalay ama ay tahay mid aan haboonayn, xafiiska Awooda u leh ee Waaxda Xidhiidhku waxa uu ku samayn doonaa lambar muuqda oo ay ka horeyso ama ka danbayso shaambada xafiisku.

3. Qof kasta oo been abuurta, dib u habeeya, ama tirtira, ama si uun u saameeya qacaayada nooceeda ama lambarka mishiinka ama tareenlaha, waxa lagu ciqaabi doonaa, haddii sharcigu uusan ka dhigayn denbi culus, xadhig ka bilaabma saddex ilaa lix bilood.

## QAYBTA 7AAD
## DIWAANGELINTA IYO RUQSAD SIINTA

### Qodobka 41aad
### Adeegsiga Gawaadhida, Mootooyinka iyo Tareenlayaasha

Gawaadhida, mootooyinka iyo tareenlayaasha waxa loo adeegsan doonaa sidan soo socota:

1) **Adeegsiga Gaarka ah**

a) Qaadida rakaabka
b) Qaadida rakaabka lagu qaado gawaadhi ama mooto la soo kiraysto oo bilaa wade ah
c) Qaadida rakaabka lagu qaado gaadhi ama wade la soo kiraysto
d) Gurida badeecada
e) Qaadida rakaabka iyo badeecada, aan isku mar ahayn
f) Qaadista rakaabka iyo badeecada
g) Jiidida gawaadhida
h) Adeegsida gaarka ah, ama gurida badeecooyin gaar ah.

**2). Isticmaalka Dadweynaha:**

a) Tagaasida lagu qaado dadweynaha ama badeecada;
b) Gawaadhida adeega dadweynaha ee lagu guro rakaabka ama badeecada.
a) Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabmaya 70,000 ilaa 200,000 SL.Shls/=.

**Qoddobka 42aad**
**Qaadida Rakaabka iyo Badeecadaha.-**

1. Qaadida rakaabka iyo badeecadaha ee ay sameeyaan gawaadhida loogu talo galay ujeedada kali ah ee in lagu qaado badeecadaha waa la mamnuuci doonaa xaaladahan:

    a. isla waddada ay adeegsadaan gawaadhida adeega dadweynaha ee caadiga ahi;

    b. haddii uu gaadhigu sido alaabo khatara, sida waxyaabaha qarxa, gubta, ama alaab kasta oo kale oo khatar ku keeni kara culays ahaan, ama taangiyada, ama biraha iskaraabka ah, ama waxyaabaha affarta shaag leh,

    c. haddii meesha rakaabku ay fadhiyaan ay keenaso in dherarka guud ee gaadhiga uu ka kormaro xadkii loo jideeyay;

    d. haddii tirada rakaabku ay ka bataan 15 qof;

    e. Haddii culayska guud ee rakaabku iyo kan badeecadu ay ka bataan culayska uu qaadi karo gaadhigu. Ujeedooyinka farqadani, culayska qof kasta waxa laga soo qaadayaa in uu yahay 70 kgs;

    f. haddii gaadhigu yahay tareenle;

    g. Farqadaha Qodobkani looma adeegsan doono rakaabka fuushan shidka gaadhiga.

    h. Gawaadhida sida rakaabka iyo badeecada sinaba xawaarahoodu ugama badan karo 50kms saacadiiba.

2. Gawaadhida loo sameeyay loona qaabeeyay ujeedada
3. ee ah in ay badeecad qaadaan waxa ay qaadi karaan rakaab iyada oo ay shardi tahay in fasaxa loogu ogolaaday in uu bixiyay xafiis awood u lihi oo ka mida Waaxda Gaadiid. ka

4. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan 70,000 ilaa 200,000 SL.Shls/=.

**<u>Qodobka 43aad</u>**
**Diwaangelinta iyo Buuga Diwaangelinta**

1. Gaadhi kasta, ama mooto kasta, ama tareenle waa la diwaangelin doonaa buuga Diwaangelintana waxa soo saari doona xafiis awood u leh oo ka tirsan waaxda xidhiidhka oo khuseeya hawshaasi gawaadhida.

2. Buuga diwaangelintu waxa uu ka koobnaan doonaa dhamaan faahfaahinta la xidhiidha Diwaangelinta gaadhiga, aqoonsigiisa, sancadiisa iyo noociisa.

3. Buuga Diwaangelinta ee loo soo saaray tareenle waxa kale oo uu muujin doonaa nooca buudhiga uu jiidayo, iyo faahfaahinta kale ee lagama maarmaanka u ah si loo hubiyo in si fiican oo nabdoon uu u jiido buudhigaasi.

4. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 10,000 ilaa iyo 50,000 SL.Shls/=.

**<u>Qodobka 44aad</u>**
**Nuqulka Buuga Diwaangelinta**

1. haddii buuga diwaangelintu uu lumo, la xado ama uu baaba'o qof ka leh gaadhigu waxa uu u soo wargalin doonaa dhacdada, Maddaxda Bilayska, muddo ku siman 48 saacadood,kuwaas oo u soo saari doona warqad ku meel gaadha oo mudeysan.

2. Warqadaasi waxa loo tixgalin doonaa fasax sharci ah oo lagu wadan karo gaadhiga.

3. Haddii, sodon maalmood ka dib taariikhda uu lumay, la xaday ama googo'ay ee loo soo sheegay Maddaxda Bilayska buuga Diwaangelinta la waayo, nuqul buuga Diwaangelinta ah ayaa loo soo saari doonaa.

4. Qof kasta oo ku guul daraysta in uu waafaqo farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 5,000 ilaa 25,000 SL.SHls/=.

**Qodobka 45aad**
**Wareejinta Lahaanshaha Gaadhiga- Badalida Ciwaanka Mulkiilaha-**

1. Ogaysiinta wareejinta khuseysa lahaanshaha, gaadhiga ama mootooyinka ama tareenlaha iyo badalaada wax ka mid ah ciwaanka mulkiilaha qofka ay khuseysaa waxa uu siin doonaa xafiiska awooda u leh ee ka tirsan waaxda xidhiidhka soddon maalmood gudahoodna, waraaqaha waxa loo gudbin doonaa xafiiskaasi oo qaadi doona talaabooyinka lagama maarmaanka ah oo ku diwaangelin doona isbadalkaasi buuga Diwaangelinta.

2. Qof kasta oo ku guul daraysta in uu waafaqo farqadaha Qodobkan waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **10,000 ilaa 50,000/= SL.Shls/=.**

**Qodobka 46aad**
**Burburinta ama Dhoofinta Gaadhiga**

1. Haddii gaadhi, ama tareenle la burburiyo ama gabi ahaanba la dhoofiyo, qof ka haysta buuga diwaangelintu waxa uu ku ogaysiin doonaa xafiiska awooda u leh ee waaxda gaadiidka muddo soddon maalmood gudahood ah, wuxuu sidoo kale isla markaaba keeni doonaa buuga Diwaangelinta iyo calaamadaha Diwaangelinta xafiiskaasi ay khuseyso.

2. Qof kaska oo ku guul daraysta in uu waafaqo farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **5,000 ilaa 25,000 SL.Shls/=. .**

**Qodobka 47aad**
**Baadhitaan**

1. Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidku waxa ay qaraar lagu daabacayo faafinta rasmiga ah, ku amri doontaa in baadhitaan guud ama mid gaar ahaaneed lagu sameeyo gaadhiga, mootooyinka adeega gaar ka ah lagu qabsado iyada oo ay ujeedadu tahay in la hubiyo in cod naaqusayaashu ay ku xidhanyihiin oo ay shaqaynayaan gaadhiga xaaladiisuna ay waafaqsantahay shuruudaha badbaadada.

2. Baadhitaankaasi waxa la hirgalin doonaa si mudaale ah oon ka yarayn shantii sannoba hal mar.

3. Gawaadhida yar yar iyo mootooyinku kuma jiraan farqadaha hore, tagaasida kirada ah, gawaadhida la kireysto, iyo tareenlayaashu waa la baadhi doonaa lana hubin doonaa sanad kasta.

4. Gaadhi yar oo kasta, iyo mooto kasta waa la baadhi doonaa mar kasta oo ay jirto sabab lagu rumaysan karo in cod naaqusuhu aanu si haboon u shaqaynayn.

5. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi aan soo marin baadhidaasi la soo sheegay, waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **10,000 ilaa 30,000 SL.Shls/=.**

6. Buuga Diwaangelinta waa lagala noqon doonaa qofka gaadhigiisu aanu soo marin baadhidaasi la waajibiyay, waxana loo diri doonaa xafiiska awooda u leh ee ka tirsan waaxda gaadiidka iyada loo celin doonaa qofka mulkiilaha ah marka gaadhigaasi la baadho.

# QAYBTA 8AAD
# TAARIKADA LIISANKA

## <u>Qodobka 48aad</u>
## Taarikada Liisanka Ee Gawaadhida, Iyo Mootooyinka Iyo Tareenlayaasha (A) Taarikada Liisanka Ee Xaga Danbe.

1. Taarikada xaga danbe ee lambarku waxa uu noqon doonaa laydi, 275mm dherar ahaan iyo 220 mm balaca, oo ka xardhan dhinacyada lehna affar dalool oo midkiiba cabirkiisu yahay 5mm dhumuc ahaan.

2. Magaca gobolka gaadhiga laga diwaangeliyey, oo ay la socoto lambarka diwaangelintu, astaanta rasmiga ah iyo kalmada (Soomaaliland) waa in lagu muujiyaa Taarikada danbe. Taarikada waxa laga samayn doonaa bir ama walax kale oo u eeg, oo ay ku xusantahay xarfaha iyo lambarada oo ku xardhan oogo madaw.

3. (b) *Numberka Taarikada ee Hore.-* Taarikada hore waxa uu noqon doonaa laydi, 267 mm dherar ahaan, 62.165 mm balac ahaan, oo dhinacyada ka xardhan lehna affar dalool oo midkiiba yahay 5 mm dhumuc ahaan.

4. Taarikada hore waxa lagu muujin doonaa dhamaan calaamadaha ku xusan Taarikada danbe marka laga reebo kalmada (Soomaaliland). Taarikadaasi waxa laga samayn doonaa bir ama walax kale oo la mid ah, oo ku xardhan xarfo iyo numbaro cadaana oo ku yaala oogo madaw ah.

5. Gaadhi kasta iyo mooto kasta waxa ay lahaan doontaa taariko aqoonsi xaga danbe kaga dhagsan oo leh numbarka aqoonsi ee u gaarka ah.

6. Calaamada diwaangelintu waxa ay noqon doontaa laba midh oo kan kale kaga xidhanyahay xaga hore ee gaadhiga.

7. Tareeenle kastaa waxa uu lahaan doonaa taariko u gaara oo ay ku xusantahay calaamada diwaangelintu.

8. Gawaadhida ku jira tijaabada, ha noqdaan farsamo ahaan ama iib ahaanba, waxa ay lahaan doonaan taariko lagu wareejin karo gaadhi kale. Lambarkaasi waxa si gaar ahaaneed loo siin doonaa warshadaha iyo wakiiladooda, wakiilada iibka iyo dadka iska leh meelaha lagu dayac tiro.

9. Calaamadaha Diwaangelinta ee lagu sheegay taarikadu waxa ay badanaaba noqon doontaa mid si cad u muuqata. Taarikadana waa la badali doonaa markasta oo ay calaamadaasi noqdaan qaar aan muuqanayn.

10. Qof kasta oo ku guul daraysta in uu waafaqo farqadaha kowaad, saddexaad, iyo kan shanaad ee Qodobkani waxaa lagu ciqaabi doonaa xadhig gaadhaya ilaa hal bil iyo ganaax ka bilaabma 40,000 ilaa 100,000 SL.Shls/=.

11. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi leh lambar aqoonsi oon ahayn kii loogu talo galay noociisaasi waxa lagu ganaaxi doonaa xadhig dhan ilaa saddex billood iyo ganaax dhan 80,000 ilaa 200,000 SL.Shls/= gaadhigana waa lagala wareegi doonaa.

12. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha labaad, iyo tan afraad ee Qodobkan waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **20,000 ilaa 60,000 SL.Shls/=.**

## Qodobka 49aad
## Lumida Taarikada Lambarka

1. Mar kasta oo uu taariko lambar lunto, la xado ama uu baabad'o, qofka leh buuga diwaangelintu waxa uu muddo dhan 48 saacadood gudahood, uu ku soo wargalin doonaa dhacdada madaxda booliiska, kuwaas oo u soo saari doona warqad.

2. Warqadaasi waxa loo aqoonsan doonaa fasax sharci ah si loo adeegsado gaadhiga, iyada oo ay shardi tahay in lambarada taarikada luntay in si muuqata loogu muujiyay gaadhiga xagiisa danbe oo uu ku muujiyay qofka ay khuseysaa.

3. Haddii shan iyo toban casho gudahood maalinta warbixta la keenay kadib taariko lambarkaasi la waayo, lambar diwaangelineed oo cusub baa la siin doonaa.

4. Farqadaha Qodobka kowaad iyo kan saddexaad waxa loo adeegsan doonaa xaaladaha lumitaanka, xatooyada ama baabiinta lambarada tijaabada ah.

5. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya in uu waafaqo farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma 20,000 ilaa 50,000 SL.Shls/=.

**Qodobka 50aad**
**Soo Saarida, Iibka iyo Qaybinta Taarikada**

1. Lambarka liisamada gawaadhida (taarikada), tareenlayaasha ama mootooyinka qayb kastaa isku mid ayay noqon doontaa, Dawlada oo kali ah ayaa leh awooda in ay soo saarto ama iibiso Taarikadaasi.

2. Taarikadaasi waxa lagu qaybin doonaa xafiis awood u leh oo ka tirsan waaxda xidhiidhka.

3. Farqadaha sare ku xusan waxa kale oo loo adeegsan doonaa Taarikada loogu talo galay tijaabada.

4. Qof kasta oo si sharci daro ah u soo saara ama u iibiya Taarikada gawaadhida ama mootooyinka ama ka faa'iidaysta taariko lambaro si sharci daro ah loo sameeyay, waxa lagu ciqaabi doonaa haddii denbigiisu uusan ka cuslayn, xadhiga gaadhaya ilaa lix bilood iyo ganaax ka bilaabma **100,000 ilaa 500,000 SL.Shls/=.** .

## QAYBTA 9AAD
## SOCODKA JIDADKA EE GAWAADHIDA BEERAHA

**Qodobka 51aad**
**Baaxada Gawaadhida Beeraha**

1. Farqadaha la xidhiidha qaadka guud ee gawaadhida guud ahaan iyo tareenlayaasha waxa loo adeegsan doonaa si isku mid ah gaadiidka beeraha ee leh mishiinka ama la jiido, ee soconaya waddooyinka.

2. Gaawaadhida beeruhu si ay u socdaan waddooyinka waxa ay u baahan doonaan fasax gaar ah, kaas oo adeeg ahaan awgii la saarayo xadi ka badan kii loo gooyay culays ahaan iyo mug ahaanba.

3. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **10,000 ilaa 50,000 SL.Shls/=.**

**Qodobka 52aad**
**Qalabka Gaadiidka Beeraha**

1. Gawaadhida beeraha aan lahayn taayirada ama leh silsilada marka ay socdaan waddada waxa loo qalabayn doonaa qaab si looga ilaaliyo in ay ciida qaadaan, dhaawacaan, ama si xun u dhaawacaan oogada waddada.

2. Gawaadhida matoorka leh ee beeraha iyo kuwa qalabku ku xidhanyahay ee beeraha loogu talo galay waxa lagu qalabayn doonaa biriigyo wax qabanaya.

3. Baabuurta beeraha ee matoorka leh, baabuurta tareenlayaasha iyo baabuurta kale ee beeraha ee la jiidaa waxa lagu qalabayn doonaa qaababkan soo socda oo leh seenyaale muuqda iyo laydh.

- **Baabuurta Beeraha ee Mishiinka leh**

**1.** Laydhka taagnida oo cadaana oo ku xidhan xaga hore iyo laydh casaana oo xaga danbe ah, iyo muuq celiye casaana oo xaga danbe kaga xidhan;

**2.** Laydh wayn oo hore kaas oo bixinaya laydh cadaana iyo mid huruuda;
**3.** Laydh iftiimaya, oo cad xaga hore iyo mid casaana oo xaga danbe ah, haddii uu gaadhigu yahay mid leh cabir gaar ah.

- **Tareenlayaasha Beeraha**

**1.** Muuq baahiye cadaana oo xaga hore kaga xidhan; laydh xerayn (taagni) oo casaana iyo muuq soo celiye xaga danbe kaga xidhan;

**2.** Laydh digniineed oo xaga danbe kaga xidhan, oo loogu talo galay cabir gaar ahaanneed oo loo sameeyay tareenlayaasha.

4. Taarikada lambarka xaga danbe kaga xidhan waa in laydh cadaana lagu shidaa si uu u muuqdo.

5. Qof kasta oo dabaqi waaya farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **10,000 ilaa 50,000 SL.Shls/=.**

**Qodobka 53aad**
**Diwaangelinta iyo Buuga Diwaangelinta ee Gawaadhida Beeraha**

1. Gaadhi kasta oo beereed iyo tareenle kasta oo beereed waxa la siin doonaa buug diwaangelineed kaas oo ay soo saareen Xafiis Awood u leh oo ka tirsan xafiiska xidhiidhku.

2. Buuga Diwaangelinta waxa lagu xusi doonaa faahfaahinta la xidhiidha Diwaangelinta gaadhiga aqoonsigiisa iyo sancadiisa.

3. Qofka wada xoolo, iyo sidoo kale dadka ku hawlan beeraha, wax soo saarka beeraha iyo hawlaha beeraha waxa loo ogolaan doonaa baabuurta beeraha ujeedooyin ah kuwa shaqada.

4. Qof kasta oo ku isticmaala waddo isaga oo wata gaadiid beereed kaas oon la siinin buuga Diwaangelinta waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma **50,000 ilaa 100,000 SL.Shls/=** ama xabsi gaadhaya **15 casho**.

**Qodobka 54aad**
**Wareejinta Lahaanshaha Baabuurta Beeraha-Badalaada Ciwaanka Mulkiilaha**

1. Ogaysiinta badalaada lahaanshaha ama badalaada ciwaanka qofka mulkiilaha waxa la siin doonaa qofka ay khuseyso ee ka shaqaynaya waaxda xidhiidka waqti go'an iyada oo loo eegayo farqadaha lagu sheegay Qodobka 45naad.

2. Qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha hore waxa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan **10,000 ilaa 50,000 SL.Shls/=.**

3. Buuga Diwaangelinta waa lagala noqon doonaa qofka lagu helay in uu ku gafay Qodobkan, waxana loo diri doono xafiiska awooda u leh ee ka tirsan waaxda xidhiidhka waxana lagu soo celin doonaa mulkiilaha gaadhiga isla marka la helo ogaysiinta wareejinta gaadhiga ama badalaada ciwaanka.

**Qodobka 55aad**
**Taarikada Gawaadhida Beeraha**

1. Taarikada gawaadhida beeraha waxa lagu maamuli doonaa farqadaha Qodobada 48aad, 49aad ama 50aad.

2. Taarikada baabuurta beeraha waxa lagu qaybin doonaa xafiiska ay khuseyso ee ka tirsan waaxda Xidhiidhka.

3. Qof kasta oon ku dhaqmin farqadaha Qodobkani waxa lagu ganaaxi doonaa si waafaqsan qodobada 48aad, 49aad, iyo 50aad.

# QAYBTA 10AAD
# WADDIDA BAABUURTA IYO KAXEYNTA XOOLAHA

### Qodobka 56aad
### Shuruudaha Waddida Gaadiidka iyo Kaxaynta Xoolaha

1. Qof kasta oo kaxaynaya gaadhi ama xoolo wadaa waa in uu ahaadaa mid jidh ahaan iyo maskax ahaanba caafimaad qaba waana in uu sidoo kale noqdaa:

   a. 15 jir haddii uu waddo gaadiid xoolo jiidayaan, ama uu waddo hormo, xayn, ama tiro xoolo ah. Dada ugu yar ee kaxayn karta gaadiidka la jiido ee adeega bulshada waxa loogu dari doona da'diisa 10 ilaa 18 sanadood;
   b. Waa in uu ahaadaa 16 jir haddii uu waddo mooto;
   c. c) 16 jir haddii uu waddo mooto oo leh mug dhululubo oon ka badnayn 125 centimitir oo saddex jibaaran;
   d. 18 jir haddii uu waddo gaadhi ama mooto oo leh mug dhululubo oo ka badan 125 centimitir oo saddex jibaaran;
   e. 21 jir haddii uu noqdo gaadhi adeeg bulsho ku jira ama mooto.

2. Qof kasta oo ku gafa xubnaha farqada c), d) iyo e) waxaa lagu ciqaabi doonaa xadhig ka bilaabma 5 ilaa 15 casho iyo ganaax ka bilaabma 15,000 ilaa 50,000 SL.Shls/= qof kasta oo ku dhaqmi waaya farqadaha a) iyo b) waxa lagu ciqaabi doonaa ganaax ka bilaabma **5,000 ilaa 30,000 SL.Shls/=.**

### <u>Qodobka 57aad</u>
### Liisanka Waddida Mootooyinka iyo Gawaadhida

1. Qofna kaxayn maayo mooto ama gaadhi oo awooda mugeedu ka badanyahay 125 centimitir oo saddex jibaaran haddii uusan sidan liisan wade oo ay bixisay xafiis awood u leh oo ka tirsan waaxda xidhiidhku.

a. Qofka sita liisanka wadaha waxa uu kaxayn karaa baabuurta qaybahani ay ka mid yihiin:
b. Mootooyinka ay mugooda dhululubo ee mishiinkoodu uu ka badanyahay 125 centimitir oo saddex jibaaran;
c. Gawaadhida iyo baabuurta ay awoodoodu ka badantahay 15 sql;
d. Gawaadhida awoodoodu ka badantahay 35 qls;
e. Gawaadhida leh awooda ka badan 35 qls iyo basaska;
f. Baabuurta qalabku ku rakibanyahay;
g. Gawaadhida qalabku ku xidhanyahay iyo gawaadhida loo isticmaalo dhismayaasha;
h. Gaadiidka dadka curyaamiinta ah (mootooyinka, mootada yaryar, iyo gaadiidka kale ee loogu talo galay in ay adeegsadaan dadka ay hayso mushkilad dhinaca jidhka ah ama curyaanimo).

i. Liisanka waddida baabuurta ee noocyada C) ama D) waxa kali ah oo la siin doonaa dadka lahaa ugu yaraan lix bilood liisan wadenimo gawaadhida ay noocyada B) iyo C) sida ay iskugu xigaan.

2. Liisanka waddida gawadhida noocyadoodu yihiin A) iyo B) waxa la siin doonaa baabuurta si gaara loo adeegsado ama kuwa adeega bulshada, iyada oo ay shardi tahay in liisanka wadashada baabuurta adeega bulshadu in la siiyo oo kali ah dadka lahaa ugu yaraan lix bilood liisan wadasho baabuur shakhsi ah oo isla noocaasi ah.

3. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi ama mooto isaga oon lahayn liisanka looga baahanyahay waxa lagu ciqaabi doonaa xabsi gaadhaya affartan maalmood iyo ganaax gaadhaya 50,000 ilaa 100,000 SL.Shls/=.

## Qodobka 58aad

## Shuruudaha Dhinaca Jidhka iyo Maskaxda ee Qaadashada Ruqsada Wadenimada

1. Qofka soo codsanaya ruqsada wadenimada xaq uma yeelan karo imtixaanka shardiga ah haddii uu u hayo xanuun xaga maskaxda ama jidhka ahi, ama ay xubini hawl gabtay taas oon u saamaxayn in uu gaadhi u kaxeeyo si nabadgalyo ah.

2. Xaaladaha maskaxeed ama jidheed ee qofka soo codsadaha ah waxa hubin doona dhakhtar ka shaqeeya meeshaasi awooda u leh waxana lagu xusi doonaa shahaado lagu soo saaray in ka yar saddex bilood, ka hor inta aan la soo qaadan codsiga si uu u qaado tijaabada. Shahaadada waxa ku lifaaqnaan doona codsiga.

3. Xaaladaha maskaxeed ama jidheed ee dadka ay hayso curayaanimo xaga jidhka ah waxa soo bixin doona komishanka caafimaadka ee gobolka.

## Qodobka 59aad
## Shuruudaha Dambiilaha Dhinaca Helida Liisanka Wadenimada

Qofka soo codsanaya liisanka wadenimadu xaq uma yeelan karo in laga qaado imtixaanka tijaabada ah haddii uu yahay denbiile caadayste ah haddii ay ku socdaan talaabooyin la socosho oo maamul ama talaabooyin kale oo amaan.

## Qodobka 60aad
## Ruqsada Bartaha

1) Xafiiska awooda u leh ee ka tirsan Waaxda Xidhiidhku waxa ay siin doonaan fasax in uu barto waddida qof kasta kaas oo keensada codsi si looga qaado tijaabo liisanka Wadenimada, taas oo ay weheliyaan shahaadada caafimaadka iyo waraaqaha kale ee looga baahanyahay, oo buuxiyay shuruudihii jidh ahaan ama maskax ahaanba.

2) Qofka haysta fasaxa bartuhu waxa uu xaq u yeelan doonaa in uu barto in uu kaxeeyo gaadhi oo ah nooca liisanka wadenimadiisa uu soo codsaday, iyada oo ay shardi tahay in uu kaxeeyo gaadhi kaliya marka uu kormeerayo qof liisan wadenimo lahaa ugu yaraan hal sanno kaas oo u ogolaanaya gaadhi la mid ah kan uu isagu liisankiisa haysto, kaas oo sidoo kale gaadhiga la saarnan.

3) Fasaxa qofka bartaha ahi waxa uu noqon doonaa mid ansaxa laba bilood waxa kale oo uu noqon doonaa, sabab ku filan awgeed mid la cusboonaysiiyo saddex bilood oo kale.

4) Qof kasta oo kaxeeya gaadhi isaga oon lahayn fasax barasho gaadhi waxa lagu ciqaabi doonaa xadhig dhan bil ilaa 6 bilood iyo ganaax ka bilaabma **100,000 ilaa iyo 200,000 SL.Shls/=** qof kasta, oo haystay shahaadada barashada oo kaxeeya gaadhi marka uuna barihiisu la joogin, ama kaxeeya gaadhi aanu noocisa liisanka barasho u qaadan, waxa lagu ganaaxi doonaa sida ay u kala horeeyaan ganaax ka bilaabma **5,000 ilaa 30,000** ama ganaax ka bilaabma **10,000 ilaa 35,000 SL.Shls/=.**

## Qodobka 61aad
## Dugsiyada Barashada Waddida Baabuurta

1. Dugsiyada Barashada Waddida Baabuurta waxaa ogolaan kara Wasaarada Hawlaha Guud, iyo Xidhiidhka, Waaxda Xidhiidhka, oo ay shardi u tahay in ay kormeertaa.
2. Dugsiyada Barashada Baabuurtu waxay yeelan karaan noocyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin:

a. dugsiyada Barashada Baabuurta ee darajada A) iyo darajada B) gaadiidka, loo isticmaalo si gaar ah iyo kuwa adeega dadweynaha;
b. dugsiyada Barashada Baabuurta ee darajada C), D) ama E) ee gaadiidka;
c. Dugsiyada Barashada baabuurta ee gawaadhida beeraha iyo gaadiidka loo isticmaalo dhisida waddooyinka.

3. Ogolaanshaha waxa la siin karaa hal ama laba nooc oo ka mid ah dugsiyada

4. Codsiyada bixinta ogolaanshaha waxa la socon doona waraaqo cadeynaya:
   - **a.** In codsadaha, agaasimaha, macalimiinta iyo baraha gaadiidku ay yihiin ashkhaas leh dhaqan fiican;
   - **b.** In codsaduhu uu haysto dhaqaalaha lagama maarmaanka ah;
   - **c.** In codsaduhu uu yahay xaqlaha goobaha lagama maarmaanka ah ama uu heli karo isagu;
   - **d.** In qalabka lagama maarmaanka ah, saabaanka iyo gaadiidka laga helo codsadaha.

5. Ogolaansho lama siin doono caadaystayaasha faldambiyeedka, ama kuwa ku shaqaysta faldenbiyeedyada ama qofka laga qaadayo talaabo maamul oo amaanka shakhsi ah ama talaaboyin kale oo amaan.

6. Dhamaan gaadiidka ay isticmaalaan dugsiyada Barashada Baabuurtu waxaa laga cayiminayaa (insured) khatarta uu ku keeni karo qof saddexaad taasoo ka soo baxaysa isticmaalka gaadiidkan oo kale, xadi aan ka yarayn xadiga uu sheegtay Wasaarada Hawladaha Guud iyo Xidhiidhku.

7. Wasaarada Hawlaha Guud iyo Xidhiidhka waxay hubin doontaa iyada oo ka qaadasa tijaabooyin ku haboon, ku haboonaanta agaasimaha, macalimiinta, baraha Barashada Baabuurta; sidoo kale waxay go'aansan kartaa shuruudo noocee ah ayaa lagu imtixaamayaa macalimiinta iyo barayaasha gawaadhida si loo hubiyo awoodahooda farsameed, loona siiyo tilmaan bixin ku saabsan dhismaha iyo qalabka dugsiga, iyo mudada casharada.

8. Dhamaan gawaadhida ay isticmaalaan Iskuulada Barashada Baaabuurtu ee lagu tababarayo dadka laga qaaday tijaabada lagu shardiyay in liisanka la siiyo si uu u kaxeeyo nooca B) gawaadhhida si khaasa iyo si caam ahba loo adeegsado, waxa lagu xidhi doonaa laba biriig.

9. Macalimiinta iyo barayaasha baabuurtu waa inay haystaan shahaado dugsi sare ama wax u dhigma.

10. Dhamaan awoodaha iyo ruqsadaha lagu ogolaaday sharcigii hore wuxuu ahaanayaa mid sax ah.

**11.** Qof kasta oo maamula dugsi Barashada iyada oo aanu haysan ogolaanshaha la jideeyay waxaa lagu lagu ciqaabi doonaa xadhig gaadhaya hal bil iyo ganaax ka bilaabma 40,000 ilaa 100,000 SL. SHls/=**.**

**Qodobka 62aad**

**Tijaabinta Ruqsada Kaxaynta Gaadiidka**

1. Ruqsada lagu kaxaynayo loo ogolaan maayo codsade kasta ilaa iyo uu ka gudbo imtixaanka awooda ka xaynta ee la waajibiyay.

   Guddida Tijaabinta Awooda Kaxeynta Gaadiidka waxa goob joog ahaan doonaa:

   a. Hal Ingineer oo ka tirsan Wasaarada Hawlaha Guud;
   b. Hal sargaal oo ka tirsan Ciidamada nabadgalyada Waddooyinka;
   c. Hal sargaal oo ka tirsan Wasaarada Hawlaha Guud;

2. Codsadaha ruqsada kaxaynta darajada A) ee gaadiidka isticmaalka gaar ka ah wuxuu ku qancin doonaa imtixaan qaadayaasha:

   a. Aqoontiisa calaamadaha wada marista iyo xeerasha lagu maamulo wada marista;
   b. Aqoontiisa qalabka gaadhiga ku xidhan;
   c. Awoodiisa uu ku kaxaynayo gadiidka darajada A).

3. Codsadaha ruqsada lagu kaxaynayo darajada A) ee gaadiidka ee adeega dadwaynaha waa inay ku qanciyaan imtixaan qaadashaaya.

   a. Aqoontiisa calaamadaha waddo marista iyo xeerashada lagu maamulayo wada marista;
   b. Aqoontiisa qalabka gaadhiga ku xidhan;
   c. Aqoontiisa makaanika kala duwan iyo qaybaha gaadiidka iyo shaqayntooda; ujeedadadooda muhimka ah si looga hortago dayactirka iyo jajabka;
   d. Awoodiisa in uu kaxeeyo gaadiidka darajada A);

4, Codsadaha ruqsada kaxaynta gaadiidka darajada B) ee isticmaal gaar ahaaneed waa inuu ku qanciyo imtixaan qaadayaasha:

   a. Aqoontiisa calaamadaha wada marista iyo xeerasha maamulaya waddo marista waddooyinka;
   b. Aqoontiisa qalabka gaadhiga ku rakiban;

c. Aqoontiisa qaaciidooyinka mabaadiida guud kasoo shaqada gaadiidka iyo qaybaha kala duwan ee ku jira ayna ku salaysanyihiin;
d. Awoodiisa in uu kaxaynayo darajada B) ee gaadiidka;

5) Codsadaha ruqsadaha lagu kaxaynayo dabaqada B) ee gawaadhida loo isticmaalo adeega dadwaynaha waa inay ku qanciyaan imtixaan qaadayaasha:
   a. Aqoontiisa calaamadaha wada marista waddooyinka iyo xeerasha maamulaya wada marista gaadiidka;
   b. Aqoontiisa qalabka kaasoo gaadhigu ku haboonyahay;
   c. Aqoontiisa qaraxa iyo gubashada injiinada iyo hagaajintooda qaybaha kala duwan ee gaadiidka iyo habka maamul ee lagaga hortagayo laguna hagaajinayo burburka;
   d. Awoodiisa uu ku kaxaynayo darajada B) ee gaadiidka;

6. Aqoontiisa aalada uu ku kaxaynayo darajada C) ama D) ee gaadiidka waa inay ku qanciyaan imtixaan qaadayaasha:
   a. Aqoontiisa calaamadaha wada marista iyo xeerasha maamulaya waddo marista gaadiidka;
   b. Aqootiisa qalabka gaadhiga ku rakiban;
   c. Aqoon fiican in uu u yeesho qaraxa iyo gubashada mishiinka iyo shaqadooda, iyo qaybaha kala duwan ee gaadhiga;
   d. Awoodiisa in uu ku kaxaynayo gaadhi xamuul soo leh awooda lagu cayimay xamuulada ay leeyihiin darajada soo codsigu uu la xidhiidho. Haddii codsigu la xidhiidho ruqsada lagu kaxaynayo gawaadhida basaska, codsigu sidoo kale waa inuu ku qancinayaa imtixaan qaadayaasha awoodiisa uu kaga shaqaysiin karo biriigyada, laguna kaxaynayo gaadiidka iyadoo xisaabta lagu darsanayo heerka iyo culayska jira;

7, Codsadaha ruqsada darajada E ee gaadiidka qalabaysan waa inay ku qanciyaan imtixaan qaadayaasha:

   a. Aqoontiisa calaamadaha waddo marista iyo xeerasha lagu maamulayo wada marista;
   b. Aqootiisa qalabka gaadhiga ku xidhan;
   c. Aqoontiisa adag ee qaraxa iyo gubashada injiinada iyo ka shaqayntooda, iyo qaybaha kala duwan ee gaadiidka gaar ahaan biriigyada gaadiidka iyo qiiqa baabuurka, isbiidh yareeyaha iyo waxyaabaha kala duwan ee qalabka isku dhajiya;
   d. Awoodiisa uu ka shaqeeyo biriiga kuna kaxeeyo baabuurta qalabaysan, isagoo ku qiyaas qaadanaya heerka iyo culayska jira.

8, Codsadaha ruqsada ee kaxaynta darajada F) ee gaadiidkaa (gaadiidka beeraha loo isticmaalo dhisida waddooyinka) waa
inay ku qanciyaan imtixaanqaadayaasha
:

a. Aqoontiisa calaamadaha waddo marista waddooyinka, iyo xeerasha lagu dhaqayo wada marista;
b. Aqoontiisa qalabka gaadhiga ku rakiban;
c. Aqoonta uu u leeyahay qaybaha mishiinka iyo qaybaha gaadhiga iyo shaqadooda; shaqadooda asalka ah si looga hortago loona dayac tiro burbur yimaada;
d. Awoodisa in uu kaxeeyo gaadiidka darajada F).

9. Codsadaha kaxaynaya darajada G) ee gadiidkaa, waa inuu ku qanciyaa imtixaan qaadayaasha:

a. Aqoontiisa calaamadaha waddo marista waddooyinka, iyo shuruucda lagu dhaqayo wada marista;
b. Aqoontiisa qalabka gaadhiga ku rakiban;
c. Aqoontiisa mabaadiida guud ee shaqada gaadhiga iyo qaybihiisaba lagu saleeyay;
d. Awoodisa in uu kaxeeyo gaadiidka, uu isagu iska leeyahay, kaas oo loo qaabeeyay si isaga u haboon iyada la eegayo curyaanimo.

10. Tijaabooyinka xaga sare lagu soo sheegay waxaa fulinaya Guddi ka kooban’
    a. Injineer ka socda Wasaarada Xidhiidhka iyo Hawlaha Guud;
    b. Sarkaal ka tirsan ciidamada wada marista gaadiidka;
    c. Sarkaal ka socda Waaxda Xidhiidhka.

11. Marka la tijaabinayo awooda soo codsadaha si uu u kaxeeyo, injineerka waxaa caawinkara farsamo yaqaan dawlada ah
oo si buuxda loo ogolaaday
.

12. Shikhsiyaadka gudbi waaya imtixaankaas waxay awood u lahaandoonaan ilaa bil imtixaan kale;

13. Waxay awood u lahaandoonaan ugu yaraan shan iyo toban maalmood oo imtixaan ah iyadoo la tixgelinayo ogolaanshaha ruqsada ee lagu kaxaynayo darajada A) ama darajada B) ee gaadiidka loo isticmaalo sida gaarka ah.

14. Shuruudaha soo codsadayaasha lagu imtixaami doono waxaa samayn doona Wasaarada Xidhiidhka iyo Hawlaha Guud, iyadoo lagu salaynayo baahiyaha lagu cayimay darajo kasta oo ruqsada awooda u leh.

15. Ruqsada waddida ee lagu ogolaaday iyadoo loo eegayo qodobada sharcigii hore waxay ahaan doonaan qaar ansaxa.

**Qodobka 63aad**
**Cusboonaysiinta Ruqsada lagu Wadayo ama Kaxaynayo**

1. Ruqsada waddidu waxay ansax ahaan doontaa muddo shan sano ah laga bilaabo taariikhda la soo saaray. Muddadani marka ay dhacdo, waxaa cusboonaysiin doona xafiiskii hore ee markii horeba bixiyay; ujeedadan, qofka ruqsada haystaa wuxuu keeni doonaa shahaadada caafimaadka oo la soo saaaray muddo aan ka badnayn saddex bilood oo ay soo saaray maamulkii caafimaad ee hore ee lagu xusay Qodobka 58aad, taas oo sheegasa in uu buuxiyay dhamaan shuruudihii jidheed iyo maskaxeed.

2. Qof kastoo kaxeeya gaadiid isaga oo ay dhacsan tahay ruqsadiisu waxaa lagu ciqaabi doonaa xadhig ilaa laba bilood ah ama ganaax ah laga bilaabo S/land.sh 40,000 ilaa 240,000.

3. Qofka lagu helo faldambiyeed si dhakhso ah ayaa lagala noqonayaa ruqsada waxaana loo diri doonaa xafiiska markii hore siiyay.

**Qodobka 64aad**
**Dib Eegida Ruqsada Waddida**

Haddii wax shaki ahi ka soo baxo shuruudaha baahida jidh ahaan ama maskax ah ee qofka haysta ruqsada waddida ama caafimaadkiisa uu ku kaxaynayo, xafiisyada awooda u lihi wuxuu dalbi karaa inuu isku qanciyo baadhid caafimaad ama tijaabo caafimaad ka ah.

**Qodobka 65aad**
**Waajibnimada Qaadashada Liisanka Marka Gaadhiga la Waddo**

1. Qofkasta oo gaadhi kaxaynaya waa inuu sitaa ruqsada waddida ama ruqsada wade ku shaqaysta.

2. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo s/land.sh.5,000 ilaa 25,000.

**Qodobka 66aad**
**Dib-ugala noqoshada iyo Joojinta Ruqsada Waddida Gaadhiga.**

1. Haddii qofka ruqsada u haysta inuu kaxeeyo uu u hogaansami waayo faqrada Qodobka 64aad, ruqsadiisa waxa joojin doonaa maamulkii markii horeba u ogolaaday.

2. Haddii uu boolisku soo jeediyo, Maxkamada awooda u lihi waxay ka joojin doontaa ruqsada waddida muddo bil ilaa iyo sadex bilood ah, haddii qofka ruqsada haystaa uu ku xadgudbay ugu yaraan shan ka mid ah qodobadan soo socda:

   a. Waajibka uu ku siinayo xaqa waddada cida socota waddada wayn;
   b. Mamnuucida in aan laga dhaafin ciidamada nabadgalyada waddooyinka dhanka bidixda ama meel u dhaw koonaha ama qalooca ama haddii aragtidu aanay ku filnayn;
   c. Waajibka in la ilaaliyo xadka ugu sareeya ee xawaaraha lagu socdo;
   d. Waajibka in la adeegsado laydh diciifa marka gawaadhida kale laga horyimaado;
   e. Waajibka lagu xidhanayo murayadaha indhaha ama qalabyada kale ee lagu waajibiyay ruqsada kaxaynta;
   f. Mamnuucida in la kaxaynayo marka lagu jiro xaalad cabsanaan khamri ama xaalad kale oo daawooyin sababeen;
   g. Mamnuucida in la lagu wato gaadhi dhinaca gacanta midigta oo u dhaw koonaha ama qalooca ama meesha aragtidu ayna ku filnayn.

   h. Maxkamada awooda u lihi waxay ka xayiri doontaa ruqsada muddo aan ka badnayn laba sano haddii qofka ruqsada haysta uu jiidhay qof isaga oo qofkaasi dhintay ama dhaawac xuni jidhka ka soo gaadhay, ama haddii qofka liisanka haystaa uu ku guuldaraystay in uu joojiyo isla markaana caawiyo qofkii uu jiidhay.

   i. Xaalada dambiga lagu xusay nuqdada F), ama haddii qofka la jiidhay uu dhintay ama dhaawac wayn oo jidhka ahi soo gaadhay, sarkaalka booliska ee xukumaya goobta uu shilku ka dhacday wuxuu haddii uu maleeyo sabab uu ku rumaysan karo in waduhu uu dambiile yahay, wuxuu si rasmi ah dib ugala noqon karaa ruqsada waddida gaadiidka kaasoo si dhakhso ah loogu gudbinayo Maxkamada Awooda u leh si talaabo dheeraad ah looga qado.

3. Haddii lagu xukumo denbi gaar ahaana khatar ah dabeecad ahaan, liisanka waa lagala noqon doonaa iyada oo ay amar sidaasi ku soo saaraso maxkamada awooda u lihi, liisan cusubna lama siin doono.

4. Ruqsada waddida waxa sidoo kale la noqon doona maamulkii soo saaray:

a. Haddii qofka ruqsada haysta aanu ahayn mid koobsaday shuruudihii maskaxeed iyo jidheed ee la waajibiyay;

b. Haddii qofka ruqsada haystaa uusan koobsan shuruudihii dhaqan ahaaneed ee lagu waajibiyay Qodobka 59aad;

c. Haddii natiijo ahaan tijaabadii caafimaad ahaan ee la inagu siiyay Qodobka 64aad,ay u muuqato in qofka ruqsada haysta aanu caafimad qabin si uu u kaxeeyo gaadhiga.

**Qodobka 67 aad**
**Diwaangelinta Shakhsiyaadka Ruqsada Haysta**

Diwaanka dhamaan shakhsiyaadka haysta ruqsada wadashada lagu hayn doonaa xafiiska awooda u leh ee Waaxda Gaadiidka qof kasta oo ruqsad haysta waxaa lagu sheegi doonaa:

a. Ku xadgudub kasta oo faqradaha Qodobka 66aad;
b. Shil kasta oo qof lagu jiidhay, sida lagu xusay Qodobka 66aad;
c. Talaabo kasta oo la xidhiidha joojinta ama dib ugala noqoshada ruqsada waddida.

## QAYBTA 11AAD
## QODOBO GAAR AH

**Qodobka 68aad**
**Xubnaha Ergada Diblomaayiinta ah ka Tirsan**

1. Wasaarada Xidhiidhka iyo Hawlaha Guud, codsiga Wasaarada Arimaha Debeda dartii, wuxuu siinayaa buuga diwaangelinta gaadiidka ay leeyihiin Ergooyinka Diblomaasiyiinta ahi, sidoo kale waxay diwaangelinayaan gaadiikan, ku was oo ay aqoonsan doonaan Xafiiska iyo Xarunta uu qofka aqoonsanayaa uu u shaqaynayo, waxanu ku hagaajin doonaa xafiiska awooda u leh ee Waaxda Xidhiidhka, taas oo ogaysiin doonta Wasaarada Arimaha Debeda, waxana ay noqon doontaa waajibka Wasaaradaasi in ay arintaasi keenaan oo ay ogaysiiyaan Madaxa ergadaasi uu qofka dhibta gaystay ka soo jeeday.

2. Faqaradaha Qodobkan wuxuu ku dababaqmayaa iyadoo ay shardi u tahay in uu jiro heshiis labada dal wax ku waajibinaya.

**Qodobka 69aad**
**Gawaadhida iyo Wadayaasha ay leeyihiin Ciidamada Qalabka Sidaa**

1. Ciidamada qalabka sidaa waxa waa in ay si toos ah u siiyaan baadhid dhinaca farsamo ah awgeed buugta diwaangelinta iyo lambarada taarikooyinka marka laga hadlayo gawaadhidooda ay sida gaarka ah u leeyihiin.

2. Haddii gawaadhida si gaar ah loo farsameeyey loona dhisay iyadoo loo eegayo isticmaalka gaarka ah kaasoo ay ku talo galeen, hoos iman maayaan qodobada sharcigan hirgelintiisa.

3. Baahiyaha xadidan ee la soo sheegay, tijaabada caafimaadka iyo ogolaanshaha ruqsada waddida ee wadayaasha gawaadhida ay leeyihiin Ciidamadu waxaa si toos u siin doona Ciidamada.

4. Qofka haysta ruqsada waddida ee milatariga wuxuu heli karaa ruqsada kaxaynta gawaadhida la midka ah dhinaca darajada ee si gaarka ah loo isticmaalo, iyadoon laga qaadin tijaabada aynu soo sheegnay, marka lagu daro codsiga waa la buuxinayaa iyadoo la marinayo maamulka kaasoo codsaduhu uu u shaqaynayo. Haddii codsadaha laga ereyay shaqada, codsiga waxaa la buuxin doonaa sanad ka dib erigaasi.

5. Faqradaha Qodobkani sidoo kale wuxuu ku dabaqmaa Gaadiidka iyo Wadayaasha u shaqeeya dab damiska.

6. Gawaadhida ay leeyihiin Ciidamadu dalku iyo dab damisku waxay lahaan doonaan nambarka taarikada gaadhiga, iyo calaamadaha ay go'aansato wasaarada leh maamulkoodu, iyada oo heshiis sidaa kula galasa Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidka. "

**<u>Qodobka 70aad</u>**

**Gawaadhida, Mootooyinka, Tareenlayaasha lagu Diwaangeliyay wadan Ajanabi ah**

1. Gawaadhida, Mootooyinka iyo tareenlayaasha, laga diwaangeliyay wadan Ajanabi ah, haddii dhamaan nidaamyadii kastamada oo dhan ee la xidhiidhay soo dejinta ku meel gaadhka ah la waafaqay, waxa loo ogolaan karaa in ay ku wareegaan Jamhuuriyada Soomaaliland buugii Diwaangelinta ee dalkoodu u soo saaray, muddo aan ka badnayn affar bilood.

2. Ogolaanshahaasi waxa bixin doona xafiiska awooda u leh ee ka tirsan Waaxda Gaadiidka.

3. Haddii gaadiidkan aan loo soo dejin si ku meelgaadh ah, waxa loo ogolaan doonaa in ay ku wareegaan Dalka Soomaaliland buugoogii Diwaangelinta ee asalka ahaa muddo aan ka badnayn laba bilood.

**Qodobka 71aad**
**Calaamadaha Muuqda ee Wadan kaasoo Gaadhiga laga Diwaangeliyay**

1. Gawaadhida, Mootooyinka iyo tareenlayaasha laga diwaangeliyay Wadan Ajanabi ah wuxuu, marka uu ku Somaaliland, muujin doonaa calaamada kala duwan ah ee wadankooda asalka.

2. Calamaadan kala duwan waxay ahaan doonaan sida lagu sheegay Cahdiyada Caalamiga ah.

3. Qof kastoo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax laga bilaabo s/land. Sh. 5,000 ilaa 250,000.

**Qodobka 72aad**
**Ruqsada Waddida Gadiidka ee ay soo saaraan Wadamada Ajanabiga ah.**

1. Qofka haysta ruqsada waddida ama ogolaansho caalami ah oo waddida ah oo lagu soo saaray wadan ajanabi ah wuu kaxaysan karaa gaadiid la mid ah kii ruqsada loo siiyay Soomaaliland ee fasaxa loo saaray.

2. Marka laga tago xaaladaha kale ee cahdi caalami ah oo gaar ahi ina siinayo, haddii ruqsada ama ogolaanshaha caalamiga ah aan lagu soo saarin qaabka ay sheegeen cahdiyada caalamiga ahi, waxa la socon kara turjumaad mid ka mid ah luuqadaha Jamhuuriyada, Ama qoraal u dhigma.

3. Qofka haysta ruqsad ay soo saartay wadan Ajanabi ahi waxuu heli kartaa ruqsad waddida gaadiidka ah oo darajo la mid ah, iyadoo aan lagu qaadin tijaabadan la soo sheegay ee caafimaadqabka kaxaynta.

4. Faqradaha Qodobkani waa la dabaqi doonaa iyadoo ay shardi u tahay heshiis laba geesood ahi.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya xubnaha farqadaha labaad ee Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo sl.sh 5,000 ilaa 250,000.

**Qodobka 73aad**
**Shahaadooyinka Caalamiga ah ee Mootooyinka, Gawaadhida iyo Tareenlayaasha**

1. Ka dib marka ay tusaan buugooda Diwaangelinta, Xafiiska Awooda u leh ee Waaxda Gaadiidku wuxuu soo saarayaa shahaadooyinka caalamiga ah ee looga baahanyahay wareegida Motooyinka,

2. Gawaadhida, iyo tareenlayaasha wadanka marka iyada oo la tixraacayo cahdiyada caalamiga ah, waraaqahaaso la isku waajibiyay.

3. Soo saarida ruqsada dirawalnimada, isla xafiiskaasi waxa kale oo uu soo saari doonaa fasaxa caalamiga ah ee dirawalnimada.

# QAYBTA 12AAD
# HABKA LAGU DHAQAYO AKHLAAQDA DADKA WADDADA ADEEGSADA.

### Qodobka 74aad
### Isticmaalayaasha Wadadu waa inaanay khatar gelinin ama Carqaladayn Isu Socodka

Isticmaalayaasha waddadu waa inay u dhaqmaan sidii aanay khatargelinayn ama carqaladayn wada marista waddada.

### Qodobka 75aad
### Xawaare

1. Wadayaasha waxaa looga baahanyahay inay ku socdaan xawaare aan khatar gelinayn amaanka dadka iyo hantidooda ama sababaya khalkhal ama khatargelinaya isu socodka, iyaga oo ku xisaabtamaya xanibaadaha suurto galka ah, tixgelinayana darajada gaadiidka, biriikyadiisa iyo culayskaba, nooca iyo xaaladaha waddada iyo isu socodka iyo xaalado kale oo kasta.

2. Xawaaraha waa la dhimi doonaa gaar ahaan waddada dheer een aragtidu kugu filnayn, koonaha, ama laabadka marka loo soo dhawaado dugsiyada, meelaha dadku ka gudbo waddada, iyo isgoysyada waddada, iyo meelaha laga gudbo inta lagu gudo jiro habeenkii, waddooyinka boodhka leh, waddooyinka cidhiidhiga ah ama kuwa xidhan, ama waddooyinka meelaha wax laga taago.

3. Gaadiidku waa ay dhimaan xawaaraha, haddii ay lagama maarmaan tahayna waa in uu joojiyaa, haddii wax khataro ahi ka soo baxayaan marka la dhaafayo gawaadhi kale, haddii dadka waddada lugaynaya mar hore waddada socday aanay dhinac uga istaagin si quman, ama haddii xoolaha wadada isticmaalayaa u muuqdaan inay ka didayaan marka lagu soo dhawaado.

4. Wadayaashu waa inaanay ku tartamin socodka gaadhiga.

5. Qodobada xaga sare lagu soo sheegay waxaa kale oo u hogaansami doona shakhsiyaadka wada gaadhi ximaarka, xoolaha, ama awrta raran.

6. Qofkasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 5,000 ilaa 30,000 ah.

7. Haddii falka lagu galay isgoyska waddada ama koonaha ama goolada ama meesha aragtidu soo gaabanaso iyada oo ay taas sababtay boodh ama sabab kale, qofka gafka sameeyay waxa lagu ganaaxi doonaa 10,000 ilaa 40,000 SL.SHls/=. Ganaax laga bilaabo ilaa Sl.Sh.10,000 ilaa 35,000.

## **Qodobka 76aad**
## **Xadidida Xawaaraha**

1. Goobaha degsiimooyinka ah hareerahooda (Magaalooyinka) Wadayaasha gaadiidku waxay ku xadidanyihiin xawaare dhimis 40km saacadiiba ah, iyada oon meel laga dhacayn awooda dawlada hoose si loo dajiyo xadidaadaha kala duwan ee xawaaraha lagu soconayo waddooyinka gaarka ah ama qaybo ka mid ah waddada. Xaaladan, xadidaadan xawaaraha waxaa lagu sheegi doonaa calamaad waddo mariseed oo ku haboon.

2. Gawaadhida iyo mootooyinka sida dadka ama alaabada khatarta ah waxay ku socon doonaan xawaare socod oo ah, marka ay xamuulka sidaan, 30km saacadiiba, iyo 60km saacadiiba maalaha ka baxsan goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka).

3. Gaadiidka goobaha beeraha iyo gaadiid kasta oo kale, oo aan ku qalabaysnayn taayiro oo gaadhi kale uu jiidayaa waa in aanu ka badnaan xadidida xawaaraha 25 km saacadiiba.

4. Qof kasta oo dhaafa xadidaada xawaaraha ee la soo saaray waxaa lagu ganaaxi doonaa xadhig ilaa shan iyo toban maalmood ah ama ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 10,000 ilaa 40,000 .

## **Qodobka 77aad**
## **Socodka Dhanka Midig**

1. Gadiidku waxa ay mari doonaan dhinaca midig ee haadka, dhanka u xiga gacanta midig, xataa haddii gaadiid aanu socon waddada.

2. Gaadiidka aan mishiinku wadin ee ay xooluhu jiidaan waa inay sida ugu macquulsan ee ugu dhawaadaan dhanka middig ee haadka.

3. Qodobada faqradii hore waxa sidoo kale u hogaansami doona gaadiidka kale marka ay ka gudbayaan ama ay ka laabanayaan qalooc ama xaalad kasta oo aragtidu soo gaabanaso.

4. Qof kasta oo ku socda dhinaca qaldan ee waddada goolada ama meelaha u dhaw ama xaalad kasta oo aragtidu ay soo gaabanaso, waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 10,000 ilaa 35,000.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

## Qodobka 78aad
## Xaqa Waddada

1. Marka loo soo dhawaado isgoysyada, Wadayaashu waa inay qaadaan taxadirka ugu badan si ay uga digtoonaadaan shilalka.

2. Haddii laba wade ay ku soo dhawaadaan isgoyska waddada, wadaha ka imanaya dhinaca midig ayaa lahaanaya xaqa wada.

3. Marka laga leexanayo waddada aan ahayn tii aad soo socotay, Wadayaashu waa inay istaagaan oo ay gawaadhida waddada socotana siiyaan haadka.

4. Marka dib loo baxayo ama waddada la badalayo ama laga leexanayo waddada socodka badanle, wadayaashu waa in ay u baneeyaal meel gawaadhida waddada marka horeba socotay.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan, waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 10,000 ilaa 35,000.

## Qodobka 79aad
## Dhaafitaanka Gawaadhida

1. Ka hor dhaafida, Wadayaashu waa inay hubiyaan in suurtogalnimada ay tahay in ay u dhaafi karaan si nabadgelyo ah, in waddada ka horaysaa ay si fiican u muuqato, iyo in wax gawaadhi ah oo dhafasa iyagu aysan jirin.

2. Waddaha gaadhiga la dhaafayaa waa inuu durkaa dhinaca midig ee haadka sida ugu macquulsan, xawaaraha socodkana ma kordhin karo.

3. La iskuma dhaafi karo meel u dhaw koonaha ama goolada, ama qalooca, ama buurta ama lafta, ama markasta oo aragtidu ay soo gaabanaso.

4. Dhaafida gaadhiga dhaafaya gaadhi kale waa la mamnuucay, sidoo kale dhaafida gaadiidka taagan ee sugaya isgoyska waddada in wadadu banaanaato, haddii ay tahay in la sameeyo tan, waa laga mamaarmaan in la sii waddo dhinaca midig ee laamida.

5. Dhaafida gaadiidka taagan ee ka istaagay si ay ugu ogalaadaan dadka lugaynaya inay waddada ka gudbaan waa la mamnuucay, sidoo kalana dhaafida gawaadhida taagan ee sugaya waddada isgoyska ah si uu fursad u helo, markaas oo in sidaas la yeelaa ay lagama maarmaan ka dhigaso dhinaca midig ee haadka.

6. Dhaafida gaadhi taagan kaas oo joogsaday si uu u ogolaado dadka socda in ay ka gudbaan waddada waa la mamnuuci doonaa sidoo kale.

7. Gawaadhidu isma barbar yaaci karaan marka laga reebo in midkood uu mid kale dhaafayo.

8. Qof kasta oo ka dhaafaya gaadhi dhinaca midig ama wax qalooc ahi aanu jirin ama isgoyska waddada, ama haddii aragtidu soo gaabanaso, waxaa lagu ganaaxi ganaax laga bilaabo Sl.Sh.10,000 ilaa 35,000.

9. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha kale ee Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

### Qodobka 80aad
### Masaafada Udhaxaynasa Gawaadhida

1. Masaafada u dhaxaysa gawaadhida socotaa waxay ahaan doontaa mid, marka loo eego xawaaraha, iyo xamilka culays in uu gaadhi kastaaba sida badan helo meel ku filan oo ku istaago waqti ku filan, si looga hortago isu dhaca gaadhiga ka horeeya.

2. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo **Sl/Sh. 5,000 ilaa 30,000.**

### Qodobka 81aad
### Iftiiminta Gawaadhida

1. Gaadiidku waa inay isticmaalaan laydhadhka la sharciyeeyay inta udhaxaysa 15 minit ka dib cadceed dhaca iyo 15 ka hor cadceed soo baxa.

2. Sidoo kale waxa waajiba in laydhka gaadhigu shidnaado waqtiyada roobka, ceeryaanta, siigada, ama waqti kasta oo hiimse-hiimse jiro.

3. Gaadiidka marka laga reebo baaskiiladaha saddexda shaag leh iyo mootooyinka sidoo kale waxaa la isticmaalaam marka ay taaganyihiin laydhadhka haddii uusan gaadhigaasi si cad u muujin laydhka waddada ama aanu taagnayn meel ka baxsan haadka waddada.

4. Qofkasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo **Sl/Sh. 5,000 ilaa 30,000.**

## <u>Qodobka 82aad</u>
## Laydhinta Gawaadhida iyo Tareenlayaasha

1. Inta lagu gudo jiro saacadaha iyo xaaladaha lagu cayimay faqrada hore ee Qodobka 81aad, gaadiidka soconayaa waa inay lahaadaan laydhadhkan soo socda:

    a. Haddii laydhka waddadu uu ku filanyahay: laydh hore oo diciifa iyo ladhka danbe;

    b. xaaladaha laydhka waddadu aanu ku filnayn iyo waddooyinka aan laydhka (iftiinka) lahayn: waxaa la shidayaa laydhadhka hore oo aad u cad iyo laydhadhka danbe;

2. Marka ay ka horyimaadaan gaadiidka kale, Wadayaashu waa inay laydhka hore hoos u dhigaan (naaqusaan). Laydhadhka xaga danbe waa in lagu sameeyaa tareenlayaasha socda.

3. Marka gaadiidkan xaga sare lagu sheegay ay waddada marayaan, sidoo kale laambadaha hoose iyo laydhadhka taarikada nambarka waa la shidi doonaa.

4. Laydhadhka xaga hore ee dhalaalaya laguma isticmaali karo goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka). Ujeedooyinka Qodobkan, iftiiminta waddada, waxaa loo haystaa inay ku filantay marka gaadiidku ay ka soo muuqdaan masaafo ah ilaa 50 mitir.

5. Qof kasta, uu ka horyimaado gaadiid kale, aan u hogaansamin qodobada aynu xaga hore ku soo sheegnay waxaa lagu ciqaabi doonaa xadhig ah shan iyo toban maalmood iyo ganaax ka bilaabmaya Sl.Sh. 10,000 ilaa 50,000.

6. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha kale ee Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax ilaa Sl.Sh. 5,000 ilaa 30,000.

**<u>Qodobka 83aad</u>**
**Badalida Jihada iyo Joogsiga**

1. Wadayaashu waa inay wakhti fiican bidhbidhaha uritaan si ay u muujiyaan in ay badalayaan jihada (leexanayaan) iyada oo sidaa ku muujinaya seenyaalaha bidhbidhaha.

2. Haddii dhanka midig loo laabanayo, waduhu waxa uu u ridan doonaa seenyaalihiisa.

3. Ka hor intaanu joojin, Wadayaashu waa inay ka shaqaysiiyaan bidhbidhaha joogsiga.

4. Haddii waddaha lagu qasbo inuu yareeyo xawaaraha si dhakhso ah, wuxuu u bixinayaa bidhbidhaha gaadiidka ka danbeeya.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

**<u>Qodobka 84aad</u>**
**Yaraynta Guuxa ama dhawaqa Mishiinka Gaadhiga**

1. Dhawaaqa ay sababaan waddida qaldani, gaar ahaana gawaadhida, mootooyinka iyo baaskiiladaha ama habaynta aan caadiga ahayn ee rarku, ama ficil kasta oo xidhiidh la leh isu socodka, kaasi oo ku sababi kara arbush kuwo kale, waa laga digtoonaanayaa.

2. Gaadhi kasta waxa lagu rakibi doonaa aamuusiye (cod naaquse) kaas oo lagu ilaalin doona xaalad wacan in uu ku shaqeeyo lana badali doono.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma Sl.Sh. 5,000 ilaa 24,000.

**<u>Qodobka 85aad</u>**
**Isticmaalka Hoonka**

1. Hoonka waxaa loo isticmaali doonaa inta ugu haboon.

2. Meelaha Debeda ka ah goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka), hoonka waxaa la isticmaali doonaa mar kasta oo xaaladuhu ay yihiin si loo sameeyo digniin ah maqal gaadhi kugu soo dhaw.

3. Inta lagu gudo jiro xaaladaha madawga, isticmaalka hoonka waxaa badali doona isticmaalka bidhbidhaha.

4. Wadayaasha gawaadhida sidda dhaawaca ama dadka xanuusanaya khasab kuma aha inay u hogaansamaan mamnuucaadka iyo xadidaadaha la xidhiidha isticmaalka hoonka.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

## Qodobka 86aad
## Joojinta

1. Haddii aanay si ka gadissan ina farin maamulku, dhamaan gaadiidka iyo xoolaha waxay u joogsan karaan si ku meelgaadh ah, iyaga oo dhinac istaagi doona cidhifka midig ee haadk mana dhibaataayn/khalkhalin doonaan isu socodka.

2. Wadayaasha gawaadhida iyo kuwa wada xooluhu ma joojin karaan wadada haddii aanay meel ku filani u banaaneyn.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

## Qodobka 87aad
## Dhigashada (Parking)

1. Haddii gaadiidka taagan ama xooluhu laga tahay iyada oo ayna cidina ilaalinayn, wadduhu inta uusan ka tagin, wuxuu qaadayaa dhamaan taxadaradaadka si uu uga hortago shilalka.

2. Gawaadhida lagama tagi karo haddii aan mishiinka la damin.

3. Marka ay taaganyihiin gawaadhida iyo xoolahu waxa la dhigi doonaa meel u dhaw cidhifka midig ee haadka, oo la siman badhtamaha, haddii aan si kale la si farin.

4. Goobaha degsiimooyinka (magaalooyinka), meelaha aan lahayn waddo lugeed ama surin cageed, meel ku filan ayaa looga tagi doonaa socodka dadka lugaynaya. Goobaha baabuurta la dhigto loo ogolaan maayo:

    a. Meel u dhaw isgoyska waddada, meel tiirada buurta, meelaha laga leexdo ama meesha basku istaago;
    b. Meelaha dadka lugaynayaa ay ka gudbaan ee waddada;
    c. Goob ku filan aan looga tagin socodka hal dhinac ee waddada.
    d. Meesha lagaga baxo waddada.

5. Maamulayaashu waxay leeyihiin awooda ay ku mamnuucayaan dhigashada baabuurta iyo isu soo ururka gawaadhida meelo gaar ah.

6. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh.10,000 ilaa 35,000.

**Qodobka 88aad**
**Goynta Laamida**

1. Haddii laamida uu gooyay gaadhi jabay ama xamuul ka dhacay gaadhi, ama sabab kale, waddaha waa in uu siiyaa sida ugu dhakhso badan in uu suuliyo waxaas waddada xidhay.

2. Haddii walax lagu silbanayaa ay ka dhacay gaadhi, wadduhu wuxuu qaadayaa talaabada ugu haboon ee uu ku hubinayo nabadgelyada isu socodka, isaga oo ku daadinaya ciid, gari iyo shayo kale oo ku haboon qaybta laamida ee ay saamaysay.

3. Wixii ka baxsan awooda dirawalka waa waxa u soo gurman doona hay'adaha ku shaqada leh waddooyinka.

4. Qofkasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

**Qodobka 89aad**
**Gawaadhida Taagan**

1. Haddii gaadhi aan ahayn mooto, baaskiil ama gaadhi gacanka, ay tahay in uu istaago laamiga meel ka baxsan goobaha degsiimooyinka ah(magaalooyinka), oo xoodan ama meel u dhaw dalcada buurta, ama, habeenkii haddii laydhadhka danbe ayna ahayn qaar si haboon u shaqayanaya, digniin ah in gaadhigan oo kale uu taaganyahay waxaa la dhigi doonaa waddada laamida ah.

2. Dhamaan gawaadhida waxaa lagu qalabayndoonaa calaamadahan oo kale, kuwaas oo noqon doona calaamado si joogto ah si haboon u gudbin kara digniino, lana qaadan karo balacooduna yaryahay oo lagu xidhay muuq soo celiyayaal. Calaamada waxaa la dhigi doonaa laamida ka danbaysa gaadhiga, masaafo ugu yaraan 50 mitir u jirta.

3. Calaamada xaga sare lagu soo sheegay waa mid nooc kaliya. Waxaa qaybiyay Xafiiska awooda u leh ee Waaxda Gaadiidka.

4. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doona ganaax laga bilaabo islaa Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

**Qodobka 90aad**
**Gaadiidka Militariga, iyo Banaanbaxyada I.W.M**

1. Waxaa la mamnuucay in loo kala jaro gaadiidka militariga, koloymo askar ah ama ciyaala iskuulka ah, iyo banaanbaxyada.

2. Qof kasta oo u hogaamsami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

**Qodobka 91aad**
**Qaadashada Shidaalka**

1. Gaadiidna shidaal laguma shubi karo haddii mishiinku shidanyahay iyo wax laydhadh ah, aan ahayn kuwa korontada ah ee gaadhiga ku rakiban.

2. Sidoo kale waxaa la mamnuucay in lagu cabo sigaar ama laga shido dab meel u dhaw gaadhiga halka shidaalka uu ka qaadanayo.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh.50.000 ilaa 100.000.

**Qodobka 92aad**
**Xamuulka, Waxyaabaha Siyaadada ah ee la dhaqaajinkaro iyo Waxyaabaha Gawaadhida lagu Jiido**

1. Rarka xamuulka gaadhigu waa in aanay aragtida wax u dhimin ama aanay dhibin dirawalka, lagana ilaaliyaa xamuulka in uu gaadhiga ka dhaco.

2. Haddii, iyada oo ay sabab u tahay culayska qayral caadiga ah ee badeecada ee uu gaadhigu sidaa, uu xamuulku ka dheeraado gaadhiga, wixii taxadir ah ee suurtogal ah oo dhan baa la samayn doonaa si aan loo dhaawicin dadka kale ee waddada isticmaalaya.

3. Xaalad kasta oo xamuulku dhinacyada ka soo baxo, calaamad digniin ah, oo ka kooban boodh cabirkiisu yahay 50cm dhinac walba oo xariijimo cadaan iyo casaana ku ranjiyaysan, ayaa lagu dhajin doonaa cidhifka badeecadaasi si taas oo la quman qacaayada gaadhiga.

4. Waxyaabaha siyaadada ahi waa in aanay ka dheeraan gaadhiga, marka ay lulmayaan, waana in aan la jiidin.

5. Waxyaabaha gawaadhida lagu jiido waa inaan la jiidin oogada waddada.
6. Waxaa waajiba tanka gaadhigu ku soo dego in aan waxba laga badalin.

7. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doona ganaax dhan laga Sl.Sh. 40,000 ilaa 100,000.

**Qodobka 93aad**
**Alaabada ay Sidaan Gaadiidku**

1. Culayska xamuulka ee gaadhiga, Tareeenlaha iyo gawaadhida beeruhu waa inaanu ka badnaan culayska ugu badan ee lagu xusay buugiisa Diwaangelinta.

2. Haddii culayska saxda ah ee xamuulka aan la go'aamin karin, ama haddii nooca alaabtu tahay awgeed huurka iyo roobku ay culays ku kordhinayaan, faraqa culayskaasina la mid yahay boqolkiiba toban 10% culayskii loo ogolaa ah baa loo ogolaan karaa.

3. Gaadhigu waa inaanu sii socon ilaa iyo wadduhu uu dhimo xamilka si aanu uga farabadan xadka uu sharci dajiyay.
4. Qof kasta oo aan u hogaansamin faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo ilaa **Sl.Sh. 10,000 ilaa 100,000.**

**Qodobka 94aad**
**Dadka ama Badeecada ay sidaan Gawaadhidu, Mootooyinka iyo Mootooyinka Yar yar**

1. Qofna gaadhi aanu xakamayn karin ma dhaqaajin doono.

2. Tirada shakhsiyaadka la sido, marka lagu daro waddaha, kursiga hore ee gaadhiga waa inaanu ka badnaan tirada lagu cayimay buuga diwaanka.

3. rakaabka kale, marka lagu daro wadaha, gaadhi, mooto, tig ama nooc kasta oo gaadhi rakaab qaada waa in aanay ka badnaan tirada lagu cayimay buuga diwaangelinta ee gaadiikaasi.

4. Wax badeecad ah laguma qaadi karo mootooyinka, ama mootada yar, haddii aysan guud ahaan nabdoonayn ama uusan ka laalaadin ama dhinacyada u dheerayn ama aanay gaadhiga ka horayn wax ka badan 50 cm.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sl.Sh. 5,000 ilaa 25,000.

**Qodobka 95aad**
**Waajibnimada in la Xidho Muraayadaha indhaha iyo qalabyada kale marka Gaadhiga la Waddo**

1. Qof kasta oo ruqsadiisa waddida loogu ogolaaday shardi ah in uu xidho muraayada indhaha sabab xaalad dhibaato xubnaha jidhka ah awgeed ama qalab kale, waxa looga baahanyahay in uu xidho muraayadaasi ama qalabkaasi kale marka uu gaadhiga waddo.

2. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan laga bilaabo **Sl.Sh. 5,000 ilaa 50,000.**

**Qodobka 96aad**
**Waddida Gaadiidka Qalabku ku Rakibanyahay**

1. Debeda goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka), dhamaan gaadiidka qalabku ku rakibanyahay waa inay lahaadaan laba wadde, ku waasoo kaxayn kara gaadhiga iyagoo kaayaysanaya.

2. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax ka bilaabma Sh.Sl 10,000 ilaa 40,000.

**Qodobka 97aad**
**Gawaadhida iyo Mootoyinka loo isticmaalo Badbaadinta Ciidamada iyo ujeedo Boolis ahaan**

1. Wadayaasha gawaadhida isticmaalo dabdamiska, daad guraynta ciidamada, ama ujeedooyinka booliska waxaa la isticmaali karaa digniin bixiye gaar ah oo gaadhiga ku xidhan, keliya marka gaadhiga la kaxeynayo ujeedada sare ku xusan.

2. Marka la isticmaalayo qalabkan oo kale si joog ah, wadayaashu kuma qasbana in ay waafaqaan shuruudahan, mamnuucaadka ama xanibaadaha la xidhiidha calaamadaha wadda marista waddooyinka, ama mamnuucaadka ay dhigeen calamaadaha wada maristu, ama faqradaha la xidhiidha dhaqanka isticmaalayaasha waddada; iyo qof kasta oo ah waddada gawaadhidan ama ay tahay inuu ka leexdo waddadan, waa inuu istagaa dhinaca u dhaw waddada dadka kalana u ogolaadaa in ay isticmaalaan.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo **Sh.Sl. 10,000 ilaa 40,000**.

**Qodobkan 98aad**
**Qodobada Baaskiiladaha**

1. Baaskeeladlayaasha waxa ay isticmaali doonaan gacmahooda iyo lugahooda, waxaanay ku hayn doonaan qaybta gacanta ugu yaraan gacan kaliya.

2. Waxay ahaan doonaan qaar waddada si fiican u arkaya waxaanay gudan doonaan dhamaan shaqooyinka muhiimka ah ugu badnaan sida ugu dhakhsaha badan uguna hawlkarsan. Baaskiilad layaashu qabsan maayaan gaadhi socda.

3. Qofka wada baaskiilada saddexda shaaglihi ma qaadi karo qof labaad baaskiiladiisa, marka laga reebo caruurta iyada oo ay shardi u tahay in ay baaskiiladu sidaa u qalabaysantahay.

4. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doona ganaax laga bilaa Sh.Sl. 10,000 ilaa 50,000.

**Qodobka 99aad**
**Qodobada Gaadiidka Xoolahu Jiidaan**

1. Qof kasta oo kaxeeya Gaadiidka Xoolahu jiidaan waa inaanu waligii kaga tagin gaadiidka waddada waana inuu neefka xoolaha u xakameeyaa si joogto ah.

2. Goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka), wax gaadiidka xoolo jiidaan lagaga tagi karo waddada dadweynaha.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax laga bilaabo Sh.Sl. 5,000 ilaa 25,000.

**Qodobka 100aad**
**Xoolaha**

1. Marka laga talaabayo goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka), gaadhi ximaarka, kooxo xoolo ah, waxa ilaalin doona ugu yaraan hal qof oo khibrad u leh labadii neef ee kastana mar baa la kaxayn doonaa si aan loo khatar galin ama loo rabshin isu socodka.

2. Neef kasta iyo dhib keensanaya waxaa hogaamin doona ugu yaraan hal qof, neefka xoolaha ah waxaa lagu dabri karaa dabada gaadiidka ay xooluhu jiidaan.

3. Waddada dadweynaha qofna ma hogaamin karo xoolo ama kuma kaxayn karo gaadhi dameer waddada ama laagaha dhinacooda.

4. Xoolaha lagagama tagi karo iyada oon cidi la joogin waddada dadwayanaha, haddii xoolahani ay waxyeeli karaan waddada, ama wax yeeli karaan isu socodka.

5. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sh.Sl. 5,000 ilaa 25,000.

## Qodobka 101aad
## Hormada iyo Xaynta

1. Hormada iyo xayta iyo koox kasta oo ka mid ah xoolo, oo waddada socda waxa wadi doona tiro ku filan oo dad ah waxana la waddi doonaa dhanka midigta iyada oo ugu yaraan meel iyo badh ka mid ah laamiga aan la xidhin.

2. Sidoo kale waxaa loo qaybin karaa kooxo yaryar si aanay u carqaladayn socodka caadiga ah ee waddada mana istaagi karaan waddo.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqradaha Qodobka waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo Sh.Sl. 5,000 ilaa 30,000.

## Qodobka 102aad
## Kaxaynta Xaalada Waduhu ku jiro Sakhradnimo

1. Qofna ma kaxayn karo gaadiid marka uu ku jiro xaalada saaamayn ay ku yeelatay cabida aalkoosha ama dawakhaada ay keenaan dawooyinku.

2. Qof kasta oo kaxeeya isagoo ku sugan xaalada sakhradnimo waxaa lagu ciqaabi doonaa haddii ficilku aanu dhalinin dambi ka culus, xadhig ilaa sadex bilood ah ama ganaax laga bilaabo Sh.Sl. 300,000 ilaa 1,000,000.

## Qodobka 103aad
## Dhaawacyada ay sababaan Gawaadhidu Waajibka Waddaha.

1. Waddaha gaadhiga ama mootada ee waddada dadwaynaha, ku gala shil sababa dhaawac qof ama xoolo ama waxyeeleeya hanti ha ahaato guurto ama yay ahaane, waa in uu si degdeg ah u joojiyaa gaadhiga siiyaana caawimada lagama maarmaan u ah qofka ama xoolaha uu gaadhigiisu jiidhay.

2. Wadahaasi waxa kale oo ku waajiba in uu sida ugu dhakhsaha badan u wargaliyo saldhiga booliiska ee ugu dhaw.

3. Waddaha jiidha qof ama xoolo, een joogsan, waxa uu mudan doonaa xadhig.

4. Waddaha qof jiidha, ee ku guul daraysta in uu fuliyo waajibkii ahaa in uu joogsado, waxaa lagu ciqaabi doonaa xadhig gaadhaya afar bilood ah.

5. Waddaha siin waaya caawimada lagama maarmaanka ah qofka uu jiidhay isagu, waxaa lagu ciqabi doonaa xadhig afar bilood ilaa lix bilood ah iyo ganaax dhan Sh.Sl. 40,000 ilaa 100,000.

6. Haddii, sabab la xidhiidha wadaha dhaqankooda, dhaawac aad u khatar ahi uu jiro, ciqaabta waa la kordhinayaa; haddii dhimasho ay jirtana, ciqaabta waa la labanlaabayaa.

7. Haddii qofka loo jiidhay sabab ah dayacaad kas ah oo ka timid xaga dirawalka, qodobada la xidhiidha denbiyada isku marka dhaca ayaa loo isticmaali doonaa.

8. Waddaha joojiya, haddii ay lagama maarmaan tahayna, kaalmeeya qofka uu jiidhay, isla markaana wargaliya saldhiga ugu dhaw, xadhig ma mutaysan doono ciqaabta la marinayana waa la yarayn karaa ilaa kala badh ama saddex meelood meel.

## Qodobka 104aad
## Dadka Waddada Dhinaceeda Socda

1. Haddii ay jiraan waddo cageed ama qaybta dadweynuhu, dadka waddada ka gudbayaa waa inay isticmaalaan; haddii aanu jirin qaybta dadweynuhu ama waddo lugeed, ama haddii aanay si cad ugu filnayn, dadka lugeynayaa waxa ay isticmaali karaan dhanka midigta ee cidhifka haadka.

2. Haddii ay jiraan meel dadku ka gudbaan, dadka lugaynayaa waa inay isticmaalaan si ay uga gudbaan waddada. Haddii aanay jirin meel ay ka gudbaan dadka waddada marayaa ama haddii ay meeshaasi u jirto masaafo ka badan boqol mitir, dadka waddada ka gudbayaa waxay kaga gudbi doonaan xagal quman.

3. Dadka lugaynayaa kama gudbi karaan isgoyska waddada. Marka ay ka gudbayaan meelaha wareega ah, waa inay isticmaalaan meelaha laga gudbo ee dadka lugaynaya, in kastoo ka gudubkani uu yahay masaafo ka badan boqol mitir.

4. Dadka waddada lugaynayaa waa in aanay istaagin haadka. Marka socodka wadadu uu badanyahay, waxaa laga mamnuucay kooxaha dadka lugaynaya ah inay xataa istaagaan qaybaha waddada loogu talo galay in ay isticmaalaan.

5. Haddii wadda marista aanu ilaalin saraakiil booliis ahi, Wadayaashu waa inay xawaaraha dhimaan, haddii ay lagamamaarmaan tahay, waa in ay istaagaan, si ay siiyaan waddada dadka ka gudbaya.

6. Dadka lugaynaya ee ka gudbaya laamida meelaha ka baxsan meelaha dadku ka gudbaan waa inay waddada siiyaan wadayaasha.

7. Wadayaashu waa inay istaagaan oo ay haadka siyaan qofka indhaha l'a, da'da ah ama qofka curyaanka ah iyo caruurta ka gudbaysa laamida.

8. Gaadiidka aan mishiinku wadin ee loogu talogalay in ay isticmaalaan caruurta ama curyaamiinta ahi waxay socon karaan qaybta waddada ka midka ah ee loogu talo galay dadka lugeynaya.

9. Qofna kuma ciyaari karo ciyaaro ama kuma qaban karo tababar ciyaareed waddada, haddii aan ogolaansho dhamaystiran loo siinin.

10. Dadka waddada lugaynayaa waa inay u socon si bilaa taxadira waddada caamka ah.

11. Qof kasta oo u hogaansami waaaya faqradaha Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax laga bilaabo S. Sh. 5,000 ilaa 50,000.

**Qodobka 105aad**

**Waajibka lagu Adeecayo Sarkaalada Booliska iyo Ciidamaha Nabad Gelyada Wadooyinka**

1. Isticmaalayaasha waddadu waa inay joojiyaan mar kasta oo la waydiiyo inay sameeyaan sidaas sarkaal booliis ama askari booliska ah oo qaabilsan ka hortagida faldenbiyeedyada, iyo baadhida denbiyada la xidhiidha isu socodka waddooyinka, iyada oo ay shardi u tahay in uu sargaalkaasi xidhnaado dirayskiisa.

2. Haddii uu ka codsado sargaal boolis ah ama sargaal xigeen boolis ahi lagu xusay faqrada hore, Waddaha gaadiidku waa inuu soo saaraa buuga diwaangelinta iyo ruqsada waddida, haddii dhukumentiyadan oo kale la waajibiyay, iyo sidoo kale dhukumenti kasta oo kale oo marka la eego qodobada xeerkan, looga baahanyahay in uu sito.

3. Qof kasta oo u hogaansami waaya faqrada Qodobkan waxaa lagu ganaaxi doonaa ganaax dhan Sl. Sh. 5,000 ilaa 25,000.

# QAYBTA 13AAD
# CIIDAMADA NABADGALYADA WADDOOYINKA

## Qodobka 106aad
## Adeega Ciidamada Nabadgalyada Waddooyinka

1. Adeega ciidamada nabadgalyada waddooyinka waxa ka mid ah:
   A. Ka hortaga iyo baadhida denbiyada la xidhiidha wada marista;
   B. Baadigoobka farsamo ee xidhiidhka la leh shilalka iyada oo sabab garsoor loogu baahanyahay;
   C. Hawlagalinta iyo waddida adeega xakamaynta wada marista;
   D. Badbaadada wada marista.

2. Ciidamada nabadbgalyada waddooyinku sidoo kale waa inuu ka qaybqaato hawlgalada gargaar ee xidhiidhka la leh shilalka wada marista.

3. Adeega ciidamada wada marista waddooyinka waxaa bixincdoona Wasaarada Arimaha Gudaha, marka laga reebo goobaha degsiimooyinka (magaalooyinka), markaas adeegyadan oo kale uu bixin doono Maamulka Dawlada Hoose.

## Qodobka 107aad
## Shakhsiyaadka Gudanaya Adeega Wada Marista Gaadiidka

1. Adeega ciidamada wada marista gaadiidka ee lagu xusay qodobkii hore waxaa si buuxda ugudan doona saraakiisha, ku xigenaada iyo askarta leh qaybta taraafika ee Ciidamada Booliiska Soomaaliland.

2. Adeegani waxa kale oo sidoo kale gudan kara sarkiil bilays ah oo ka tirsan booliiska, iyo sarkaalo dawlada hoose ah marka la joogo goobaha degsiimooyinka ah (magaalooyinka).

# QAYBTA 14AAD
# QODOBADA GABOBADA AH

**Qodobka 108aad**
**Iskugu Darida Denbiyada**

1. Haddii ay dhacdo denbi Xeerkan hoos yimaadaa, oo ciqaabta ganaaxa kaliya la xusay, dambi faluhu waa inuu si dhakhso ah ugu bixiyaa sarkaalka booliska ee qabtay isaga denbiga xadi lamid ah ugu yaraan kala badh xadiga ugu yar ee lagu cayimay dambiyadaas.
2. Haddii, sabab uun, bixintan aanay si dhakhso ah u suurto galin, dambi faluhu wuxuu bixin karaa ganaax, loo soo mariyo boostada, isaga oo ku bixinaya xafiiska awooda u leh, shan iyo toban maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda denbiga lagu xukumay.
3. Laga bilaabo maalinta lix iyo tobnaad, ilaa lixdanaad oo kale oo maalintaasi ah, dambi faluhu wuxuu bixin karaa xadi la mid ah kala badh ganaaxa ugu badan ee lagu cayimay denbigaas, kolba sida xaalada uu u cayimay qodobkii hore.
4. Ka dib lixdan maalmood laga bilaabo taariikhda lagu xukumay denbiga, denbi falaha looma ogolaan doono in la iskugu geeyo iyada oo lagu oogayo dacwad.
5. Denbi falaha looma ogolaan doono in la iskugu geeyo denbiyada haddii, isaga oo uu codsi kaga yimid saraakiisha booliiska ee waddo marista in uu istaago, uu istaagi waayo, ama isaga oo wade gaadhi ah, uu diido in uu soo saaro, buuga diwaangelinta ama ruqsadiisa kaxaynta ama waraaqo kale oo marka loo eego Xeerkan, uu leeyahay waajib ay ku tahay in uu sitaa.
6. Denbiga lagama dhigi karo ganaax oo kaliya, haddii, haddii ay ka dhalanaso in uu dhaawac dhinac u gaysto.

**Qodobka 109aad**
**Qaadista Ganaaxyada**

1. Haddii denbi lagu galay waddo qaran, xadiga kasta oo uu bixiyo denbifaluhu si dhakhso ah, iyadoo loo eegayo xaaladaha qodobkii hore, ama ganaax kasta oo ay ku soo rogto maxkamadi denbigaas, wuxuu noqon doonaa hantida wadanka.
2. Xadi kasta oo laga qaado oo ku shaqo leh denbiyada lagu galo waddooyinka qaranka dawladaha hoose waxay noqon doonaan hantida maamulka dawlada hoose ee ay

khusayso, haddii denbiiluhu uu ku gefay wareegtooyinka Dawladaha hoose ama amar maayorka; kay doontaba ha ahaatee, xadiyadan waxay noqon doonaan hanti meeshaasi leedahay, oo qaranka ka mid ah.

**Qodobka 110aad**
**Ganaaxyada**

1. Haddii suurtogaltahay, denbi falaha waxaa si dhakhso ah loogu ganaaxi doonaa denbiga uu falay ama sameeyey.

2. Marka laga reebo haddii denbi faluhu uu siiyay ganaaxa qofka ku waajibiyay, warbixin gaaban ayaa laga samayn doonaa qofkan, oo sheegaya denbiga, taas oo denbi faluhu codsado in loogu daro warbixintaasi.

3. Nuqul warbixintan ah ayaa loo gudbin doonaa denbi falaha.

**Qodobka 111aad**
**Ogaysiinta Ganaaxyada**

1. Haddii denbi falaha aan loo ganaaxi karin si dhakhso, ogaysiis ganaax ayaa la siin doonaa soddon maalmood laga bilaabo taariikhda denbigu uu dhacay. Haddii denbi faluhu uu yahay denbi fale aan la garanayn kaasi oo fuliyay denbiga marka uu waddo gaadhi sita taariko lambar oo la aqoonsan yahay, xukunka waxaa la ogaysiin doonaa qofka heysta buuga diwaangelinta.

2. Xukunka waxaa gaadhsiin doona askari ka tirsan booliska garsoorka, gaadhsiiye dawlad hoose ka mid ah, ama boos diwaangashan.

3. Haddii ogaysiiska lagu bixiyo boos ahaan, qodobada maamulaya ogaysiiska ficilada garsoorka ee arimaha ciqaabta ah way ku dabaqmayaan, iyada oo ay shardi tahay xafiiska qofka denbiga baadhay laga maamulo, ayaa noqon dooda dacwoode.

4. Marka la helo ogaysiiska, denbi faluhu waa inuu bixiyaa ganaaxa inta lagu gudo jiro xadka lagu cayimay faqradaha labaad, sadexaad iyo afraad ee Qodobka 108aad, xadka wakhtigan ee la xisaabiyay laga bilaabo taariikhda ogaysiiska.

5. Inta lagu gudo jiro wakhtiga la midka ah xadidaadan, qofka xukunkan la ogaysiiyay, wuxuu ka codsan karaa xafiiska awooda u leh inuu diwangeliyo odhaahdiisa warbixinta ee lagu xusay qodobadii hore.

6. Ogaysiis loogama baahna haddii denbigu uu xidhidh la leeyahay ciqaab kaasi oo ay soo oogi karto sarkaal hore, ama haddii denbi faluhu aanu deganayn Jamhuuriyada Soomaaliland.

7. Kharashka ogaysiiska waxaa lagu dari doonaa kharashaadka dacwad dhagaysiga, iyadoo loo eegayo qodobada maamulaya arintan.

**Qodobka 112aad**
**Warbixinta La Siinayo Maxkamda Degmada**

Haddii dembiyada aan lagu bixin karin ganaax ahaan, ama aan ganaaxaasi la qaadin, warbixin ayaa loo gudbin doonaa Maxkamda awooda u leh iyada oo la raacayo Xeerka Habka Ciqaabta waxa denbiga soo oogi doona Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka, denbi falaha maxkamadu waxa ay ogolaan karaa inuu bixiyo inta lagu gudo jiro shan iyo tobanka maalmood xadi la mid ah sadex meeloodow meel ganaaxa ugu badan ee loo cayimay dambiyadaas.

**Qodobka 113aad**
**Dhaqan-galka**

Xeerkani waxa uu dhaqan gali doonaa marka Golayaasha Sharci dejintu ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo, laguna baahiyo faafinta rasmiga ah ee dawlada.